# Fikrado maalgalin

100 fikrad oo cusub oo aad maalgashan karto

Waa buug ka hadlaayo dhamaan fursadaha ganacsi ee aad maalgashan karto.

## Copyright

Walaal buugaan waxaa ku baxday qarash aad u badan iyo juhdi iyo cilmi baaris aad u badan oo aan lasoo koobi karin walaal laguuma ogala in aad buugaan koobiyeeso hadii aad koobi gareeso buugaan xaaraan ayee kuugu tahay sidoo kalena waa sharci daro hadii aad koobi gareeso.

## Hibeyn

Buugaan waxaa u hibeeyay qof walba oo aqristo buugaan isla markaasna ka faaideesto oo ka hela fursad uu maalgashan karo.

## Mahadnaq

Marka koowaad waxaan u mahad celinayaa allah subxaanahu wa tacaalaa oo ii suura galiyay in aan buugaan qoro.

Marka labaad waxaan umahad celinayaa waalidiinteeyda iyo qaraabadeeda iyo dhamaan saaxiibadeeda oo igu dhiira galiyay in aan hooshaan bilaabo.

## Codsi

Buugaan markii aan diyaarinayay waxaa galiyay juhdi iyo cilmi baaris aad u badan lknse waxaan ahay bini aadan sameeyn kara qaladaad.

Walaal waxaa kaa codsanaa hadii aad buugaan ku aragto qaladaad in aad nasoo ogeeysiiso si aan ugu saxno daabacaad-yada kale ee buuga. Sidoo kale walaal waxaa kaa codsanayaa in aad ii soo qorto wixii talo iyo cabasho ah.

Copyright ---------------------------------------------------------------------------2
Hibeyn ---------------------------------------------------------------------------- 3
Mahadnaq ------------------------------------------------------------------------- 3
Codsi ----------------------------------------------------------------------------- 4

# Cutubyada buuga (Table of contents)

Hordhac.................................................................................................. 6

Fikradaha ku saabsan Adeegyada (services)................................................... 8

Fikradaha ku saabsan Wax soo saarka (production). ..................................... 53

Fikradaha ku saabsan wax soo dhoofsiga (Import)......................................... 77

Fikradaha ku saabsan Internet-ka and IT-ga .................................................. 89

Fikradaha ku saabsan Saxaafada.................................................................. 101

Fikradaha ku saabsan waxbarashada............................................................ 105

Fikradaha kusaabsan Caafimaadka .............................................................. 108

Fikradaha kale (Others)............................................................................... 111

Ganacsiyada Yaryar..................................................................................... 117

10 qaab oo aad ku heli karto fikrad maalgalin................................................ 120

Gunaanad.................................................................................................... 131

# Hordhac

Dadka soomaaliyeed waxee u badan yihiin dad hal abuur leh oo mar walba la imaado fikrado ganacsi lknse fikradahooda ganacsi meel kuma qortaan ama baaritaan dheeri ah kuma suubiyaan marwalba.Xitaa hadii eey baaritaan dheeri ah suubiyaan kuma guul-eestaan in eey hirgaliyaan fikradahooda ganacsi.

Waayahaan danbe suuqa aad iyo aad ayuu isku badalay oo ganacsatadii ilbax ayee noqdeen waxaa suurta gashay in qof walba oo lacag yar xitaa heesta in uu soo dagsan karo(import) alaab walba oo ganacsi uu u baahan yahay maxaa yeelay wadanka waxaa kusoo kordhay shirkado badan oo soo dhoofiyo alaabta.Sidoo kale suuqa waxaa kusoo kordhay shirkado badan oo deeymo baxsho sida kaah islamic microfinance. Waxyaabaha layaabka leh waxaa kamid ah marwalbo oo fikrad cusub suuqa lala yimaado oo shirkad cusub hirgaliso fikrad cusub dadka badanaa waxee yiraahdaan hadeer kahor ayaa fikradaan ku fakiray ciil badanaa maxaa u hirgalin waayay.

## 1. Logistics company

Ma jirto wadanka shirkad qaabilsan in eey badeecadaha iyo alaabaha isugu gudbiyaan dhamaan magaalada muqdisho. Waxaa jira shirkado ka shaqeeyo in eey dadka qaadaan shirkadahaas oo leh takaasi sida dhaweeye lknse majiraan shirkad badeecooyinka iyo alaabaha u qaadaan bulshada.

Ganacsiga nuucaan ah waxaa loo bilaabi karaa dhoor nuuc oo kala duwan nuucyadaas waxaa kamid ah

- ✓ In aad suubiso website iyo mobile application iyo teleefan lagaa soo wici karo oo aad isku xirto macaamiisha iyo gawaarida xamuulka qaado.
- ✓ In aad suubsato gawaari xamuulka qaado oo aad macaamiilka u qaadid alaabtaas.

Magaalada muqdisho dhamaanteeda waa la yaqaanaa oo meel walba uu macaamiilka joogo waa loogu geeyn karaa alaab-tiisa in kastoo eey wadooyinka xirmi karaan mar mar ka qaar lknse hadii wadooyinka xirmaan waxeey saameeyn kuleedahay dhamaan ganacsiyada ee shirkadaan gaar uma ahan.

## 2. Financial service Crowd funding

Shirkad kasoo aruuriso lacago yar yar bulshada islamar-kaasna lacagahaas ku bilaawdo ganacsiyo sida ganacsiyada aan buugaan kusoo sheegnay oo kale. Bulshada waxaa u suubin kartaa evcplus number ama bank account eey lacagta ku keedsadaan ugu yaraan 10 doolar halkii qof. Lacagtaas waxaa loogu maalgalin doonaa ganacsiyada aan buugaan kusoo sheegnay ama ganacsiyo kale oo aad hal abuuratay.

Si aad ganacsigaan u bilaawdo waxaa u baahantahay in aad abuurto sumcad iyo aaminaad oo hadii eey bulshada ka dhaadhacdo in aad tahay qof aamin ah oo lacag loo dhiiban karo waxaa kuu fududaan karto in eey shirkadaada lacago soo dhigtaan islamarkaasna ganacsigaaga noqdo ganacsi guuleesta.

Hadii aad u baahan tahay warbixin dheeri ah oo ku saabsan fikradaan ganacsi waxaad nagu soo booqan kartaa xaruunteena oo ku taala dhanka midig ee masjidka xareed ama waxaa naga soo wici kartaa teleefankeena oo ku qoran bage-ka hore ee buugaan.

## 3. Shirkad qaabilsan nadaafada guryaha iyo xafiisyada.

Wadanka wuxuu u baahan yahay Shirkad ka shaqeeso nadaafada sida in la xaaqo oo la tirtiro xafiisyada iyo guryaha. Hada suuqo waxaa si gooni gooni ah uga shaqeeyo maamooyin si gooni ah ula heshiiyo xafiisyada iyo guryaha oo u nadiifiyo maalin kasta lknse hadii lasuubiyo shirkad ka shaqeeso nadaafad shirkadaas oo xafiisyada iyo guryaha si raqiis ah oo tayo leh ugu qabato adeegyada nadaafadeed eey u baahan yihiin waxeey u badan tahay in eey guuleestaan.

Sidoo kale Waxaa jiro dad badan oo aad u mashquulsan oo u baahan in loo nadiifiyo guryahooda, waxaad sameysan kartaa taleefoono iyo email lagaaga soo xariiri karo si marwalbo oo loo baahan yahay shaqo lagulla soo xariiri.

In la bilaabo shirkad nadaafad uma baahno qarash badan oo lagu bilaabo kaliya waxaa u baahan tahay xafiis shaqaalo iyo qarash loogu tala galay suuq geeyn.

### 4. Isku day in aad ijaarato dhul banaan oo aad uqeeybiso qeeybo badan kadibna ka ijaarto ganacsiyada.

Ganacsiyada yar yar awood uma lahan in eey ijaartaan xafiis ama goob ganacsi lknse hadii aad ijaarato adiga xafiis ama goob ganacsi kadibna u qeeybiso qeeybo badan kadibna kasii ijaarato ganacsatada yar yar waxaad kaheli kartaa faaidooyin badan.

Hada magaalada muqdisho waxaa ka jira ganacsato ijaarto dhismo kadibna dhismahaas qol qol uga ijaaro ganacsatade kale lknse majirto shirkad qaab nuucaan ah ku shaqeesato.

Si aad u bilaawdo shirkad qaab kaan ku shaqeesato waxaa u baahan tahay in aad xiriir la suubiso dalaaleeyda si eey kuugu soo ijaaraan dhulal ama kuugu keenaan macaamiil. Sidoo kale waxaa u baahan tahay suuqgeyn xoog leh iyo in aad ijaarato meelo muhiim ah oo ganacsi laga suubin karo kadibna meelahaas u qeeybiso meelo badan oo aad kasii ijaarto ganacsatada yar yar.

## 5. Shirkad latalin

Ganacsiyada cusub iyo kuwa horey u jiray waxee u baahan yihiin shirkado kala taliyo xaga suuq geeynta shaqaalaha iyo maamulka iyo maareeynta.

Magaalada muqdisho waxaa aad ugu soo batay tartanka u dhaxeeya shirkadaha tartaankaas oo sababay in dhamaan shirkadaha eey raadiyaan qaabab cusub oo eey ku kordhin karaan daqligooda iyo qaabab cusub oo eey ku yareen karaan qarashka ku baxa shirkadahooda.

Sidoo kale waxee aad ugu baahan yihiin qaabab cusub oo eey suuqgeeyn ugu suubin karaan ganacsigooda iyo qaabab cusub oo eey sumacada shirkadooda iyo qancinta macaamiisha sare ugu qaadi karaan.

Hadii aad intaas u qaban karto shirkadaha ku yaalo magaalada muqdisho waxaad heesataa fursad weeyn oo aad ganacsi ku bilaabi karto ee ka faaideeso.Fursadaan waxee ku fiicantahay uma baahna qarash aad u badan ee waxee u baahan tahay aqoon iyo xirfad aad u xeel dheer.

## 6. Qurxinta guryaha

Hadii aad aqoon u leedahay sida loo qurxiyo guyaha iyo xafiisyada waxaa jira baahi badan oo loo qabo adeegaas.

Qurxinta guryaha Waxaad noqoni kartaa qorsheeyaha qurxinta guryaha, qaabka loo qurxini karo guryaha sidda halka la dhigaayo miisaska iyo kuraasta, TVyada, sidda uu ku qurxoon yahay iyo halka uu ku qurxoon yahay fadhiga guriga, xafiisyada. Shaqadaan waxaa u baahan Guryaha, xafiisyada, shirkadaha ganacsi iwm.

Sidoo kale guryaha waxaa ku nashqadeen kartaa sawiro background ah oo la suro guryaha in xafiisyada loo suubiyay ubaxyo iyo qaab walba oo aad u qurxin kartid xafiisyada iyo guryaha.

Baahida ugu badan ee ah qurxinta guryaha waxee tahay xiliyada arooska oo goobaha lagu dhigaayo arooska eey u baahan yihiin dad qibrad u leh sida loo qurxiyo guryaha. Fursadaan waxaa ka faaideesan kara qofkii aqoon u leh sida guryaha loo qurxiyo gaar ahaan dumarka oo arimahaas aad ugu xeel dheereeya.

## 7. wedding planning

aroosyada wadanka aad iyo aad ayuu u badan yahay hadii aad xirfad u leedahay qorsheeyta iyo nashqadeenta aroosyada oo aad u diyaari kartid goobo lagu dhigo xafladaha aroosyada ka faaideeso fursadaas.

Maalmahaan dambe waxaa sii kordhaayo baahida loo qabo qorsheynta aroosyada "wedding planning" raga maalmahaan dambe waa lagu qaaliyay guurka. Waxaana soo baxday fursado ah in lamaanaha is calmaday ay jecelyihiin inay helaan goob aad u sareyso oo soo jiidasho leh.
Qorsheynta aroosyada ayaa baahi weyn loo qabaa waxa ka faa'ideystana wey yaryihiin.

Hadii aad heli karto goob qurux badan oo lagu dhigo xafladaha arooska isla markaasna aad aqoon dheeri ah u leedahay sida loo diyaariyo xafladaha arooska waxaad heesataa fursad wanaagsan oo looga baahan yahay wadanka ee fursadaas yeesan ku dhaafin.

## 8. Consignment sale

Consignment sale waxee tahay in aad badeecada u iibisid shirkadaha tusaale ahaan in aad shirkadaha caanaha soo dhoofsado ee wadanka kula heshiidid in aad u iibiso caanahooda.

Waxaa jiro ganacsato u baahan in laga caawiyo ganacsigooda oo u iibsami waayay allaabtooda. Aad ayay muhiim u tahay inaad raadiso ganacsatadaas si aad ugu soo qaado allaabtooda qaar kadibna aad adiga iibiso. Waxaad la geli kartaa heshiis heshiiskaas oo ah shey walbo oo aan kuusoo iibiyo meeqo ayaan ku leeyahay? Boqolkiiba 15% ilaa 5% haddii aad ku leedahay ama 10% waa qorsho aad u wanaagsan. Ganacsatada waxay inta badan allaabaha ka keenaan dalka dibidiisa kadibna waxay u baahan yihiin qaabka dadka loogu dhaadhicini lahaa. Adiga waxaad u noqoni kartaa iibiyaha allaabta "salesperson" waxaad ku iibini kartaa gurigaada ama allaabta oo halkeeda taallo ayaad qofkii iibsan lahaa markaad soo hesho ayaad geynaysaa halkii ay taallay. Allaabaha noocaan oo kale waxaa ka mid ah makiinadaha, gawaaridda, mobilada iyo guryaha.

## 9. Affordable housing

Magaalada muqdisho waxa ku badan dad badan oo iskaabulo ah iyo dad badan oo ka imaaday gobolada kuwaas oo u baahan meelo raqiis ah oo eey dagaan.hadii aad u diyaarin kartid goobo deegaan oo raqiis ah oo eey dadku dagaan waxaad ka heli laheed faaido badan oo kaaga timaada kirada iyo wixii adeegyo kale ah oo aad u qabato.

Waxaa dhisan kartaa gurya badan oo jiingado ama knteenaro kasuubsan kuwaas oo loo diyaariyay iskaabulada guryahaas oo laga suubiyay qolal aad u yar yar oo qof qof looga ijaaro iskaabulada si raqiis ah.

Qorshahaan waxaa ka faaideesan kara qofkii leh dhul ama lacag badan oo uu ku dhisi karo guryo.

Lknse qorshahaan waa qorshe aad u faaido badan hadii la hirgaliyo.

## 10.shirkad ayuuto

Waxaa jira maamooyin badan oo ka shaqeesto in eey haweenka u qabtaan hoowlaha laxariira ayuutada lknse majiraan shirkad weeyn oo ka shaqeeso aruurinta lacagaha ayuutada ah shirkadaas oo u shaqeeso rag iyo dumar labadaba

Ayuutada waxee u shaqeesa qaab ahaan qof walba lacag ayuu bishii bixinayaa lacagahaas oo uu qof walba baxshay ayaa la isku darayaa kadibna hal qof ayaa la gudoonsiinayaa. Sidoo kale Ayuutada waxee u shaqeesaa qaab wareegta ah oo qof walba markiisa ayuu helayaa lacagta lknse dadka wee kala horqaadanayaan waxeena ku kala hor qaadanayaan baqtiyaa nasiib oo waa loo qori tuuraa dhamaantood.

Fursadaan waxee ku wanaagsanaan laheed qof bulshada dhexdeeda sumcad ku leh oo eey bulshadu aamintio lknse qarash ahaan uma baahna qarash badan in mashruucaan la hirgaliyo.

Waxaa aad u wanaagsanaan laheed in la aasaaso shirkad weeyn oo ayuutada ka shaqeeso oo dadka soomaaliyeed dhamaantoodba lacag ku darsan karaan.

## 11.Goobo loo dalxiis tago muqdisho oo leh xayawaano la daawado.

Magaalada muqdisho ma leh goobo laga helaayo xayawaano kala duwan oo eey dadka u soo daawasha tagaan

Dadka soomaaliyeed aad iyo aad ayee u jecelyihiin in eey dalxiisaan waxaa tusaale kuugu filan beerta xoriyada markii la bilaabay dadka aad ayee usoo buuxsheen oo maalin walba dalxiis ayee u aadaan bal kawaran hadii loo suubin lahaa meelo eey isku sawiri karaan islamarkaaas eey usoo daawasha tagi karaan in eey daawadaan xayaawanada sida libaaxa shabeelka maroodiga iyo xayaawanada kale.

Hadii la bilaabo meel nuucaas oo kale ah waxee u badantahay in lacag badan laga faaido sidoo kale meesha waxaa laga dhax furi karaa maqaayado iyo hoteelo oo eey dadku ku nastaan kuna shaaheeyaan.

In la bilaabo ganacsiga nuucaan ah aad iyo aad ayee qaali u tahay oo waxaa ku baxaayo qarash aad u badan lknse waa fursad banaan oo u baahan in laga faaideesto

## 12.Doon dalxiis

Magaalada muqdisho waxaa laga furay doontii ugu horeeysay oo ka shaqeeso dalxiiska badda lknse aad ayee qaali u tahay bulshadana waxeey u baahan yihiin doomo oo eey ku dalxiisaan badda gudaheeda.

Dadka soomaaliyeed aad iyo aad ayee u jecel yihiin in eey dalxiisaan waxaa tusaale kuugu filan beerta xoriyada markii la bilaabay dadka aad ayee usoo buuxsheen oo maalin walba dalxiis ayee u aadaan sidoo kale dhalinyarada waxee u dalxiisaan xeebta liido maalin iyo habeen labadaba bal kawaran hadii loo suubin lahaa doon eey ku dalxiisaan badda gudaheeda isla markaasna eey sawiro isaga qaadi karaan.

In la bilaabo doon dalxiis waxee u baahantahay lacag dhex dhexaad ah uma baahno qarash aad u badan oo lagu bilaabo mashruucaas.

Marka waa fursad banaan in aad maalgashato doon dalxiis oo eey dadku ku dalxiisi karaan si raqiis ah maxaa yeelay waxaa jirta baahi badan oo loo qabo doon dalxiis hadan in ganacsigaas la bilaabo qarash aad u badan uma baahno.

## 13.Shirkad soo gudbiso warbixinada ganacsiga sida qiimaha iyo nuucyada badee- cadaha ... aha laga heli karo iyo wixii lamid ah

Mar aan cilmibaaris ku suubiyay macaamiisha magaalada muqdisho waxaan kusoo ogaaday markii eey iibsanayaan alaab qaali ah in eey warbixino raadiyaan oo eey warbixin- adaas ka raadiyaan qooyskooda saaxiibadooda iyo wixii lamid ah.

Sidoo kale cilmi baaristaas waxaa kusoo ogaaday in eey u baahan yihiin shirkad ka caawiso heli taanka xogtaas shirkadaas oo suubsato website oo eey warbixinada badeecadaha ku soo bandhigaan.

Wadan walba oo dunida ku yaalo wuxuu leeyahay shirkado nuucaas ah oo macaamiisha ka haqabtira xogaha badeecada sida nuucyada kale duwan ee badeecadaas iyo qiimaha lagu iibiyo.

Waxaad aad u layaab leh in shirkad nuucaan ah eeysan ka jirin wadanka iyadoo baahi weeyn loo qabo islamarkaasna eeysan u baahneen lacag aad u farabadan.

## 14.Shirkad soo saarto warbixinda ganacsiga (industry reports).

Wadankeena soomaaliya ma lahan shirkad soo aruuriso xogaha qeeb walba oo kamid ah ganacsiyada wadanka sida qeebta waxbarashada caafimaadka gaadiidka bagaashka sarifka iyo wixii lamid ah.

Hada dadka soomaaliyeed weey ilbaxeen oo waxeey bilaabeen in eey wax aqriyaan siiba dadka ganacsatada ah kuwaas oo raadinya warbixino muhiim ah oo ka caawiya in eey hormariyaan ganacsigooda.

Sidoo kale waxaa jira arday badan oo ka qalin jabiyay kuliyada ganacsiga ardaydaas oo aad shaqaaleesiisan karto si eey kula diyaariyaan warbixinadaas.

Shirkada nuucaan oo kale ah waxaa aas aasi karo qof aqoon xeel dheer u leh ganacsiga sidoo kale yaqaana ganacsatada suuqa bakaaraha.

Fikradaan waa fikrad aad iyo aad u wanaagsan oo aanan weli laga hirgelin magaalada muqdisho.

## 15.Shirkad qaabilsan in eey soo aruuriso magacyada shirkada iyo taleefoonadooda.

Wadan walba wuxuu leeyahay liis liis-kaas oo eey ku qoran yihiin dhamaan shirkadaha ku yaalo wadanka.

Liiskaas wuxuu anfacaayaa macaamiisha tusaale ahaan hadii uu arday rabo in uu iska diiwaan geliyo jaamacad wuxuu baaraayaa liiska jaamacadaha ee wadanka mar kaas kadib ayuu ka dooranayaa mida uu rabo sidoo kale hadii uu macaamiil u baahan yahay in uu soo iibsado gaari wuxuu fiirinayaa liiska shirkadaha iibiyo gawaarida markaas ka dib ayuu ka dhax dooranayaa shirkada uu rabo in uu alaab kasoo iibsado.

Su aasha isweediinta mudan ayaa waxee tahay hadii aad shirkad nuucaan ah bilaawdo xagee lacag ka heleesaa hadaba lacag waxaad ka heleesaa in aad iibisid tobanka boos ee ugu horeeya ee liiska sidoo kale waxaa xayeesiin ugu sameeyn kartaa shirkadaha qaar adigoo lacag ka qaadanaayo.

## 16.Shirkad ka shaqeeso iibinta dhulalka.

Dadka soomaaliyeed badanaa lacagahooda waxeey ku maal gashadaan dhulalka oo dhaqdhaqaaqa iibinta dhulalka aad iyo aad ayuu u badan yahay. Sidoo kale majirto shirkad weeyn oo ka shaqeeso iibinta dhulalka lknse waxaa jira dalaaliin aad u badan kuwaas oo dhulalka kala iibiya.

Hadii laheli lahaa shirkad hal meel isugu keento dalaaliinta oo ku mideeysa hal meel aad iyo aad ayee u wanaag-sanaan laheed.

In la bilaabo shirkad nuucaan oo kale ah uma baahno lacag badan lknse waxee u baahan tahay in aad tahay qof gal gal badan oo xiriir wanaagsan la leh dadweeynaha kaasoo hal meel isugu keeni kara dalaaliinta iyo macaamiisha ubaahan in eey dhul iib sadaan.

Hadii aad u baahan tahay warbixin dheeri ah oo ku saabsan fikradaan ganacsi waxaad nagu soo booqan kartaa xaruunteena oo ku taala dhanka midig ee masjidka xareed ama waxaa naga soo wici kartaa teleefankeena oo ku qoran bage-ka h[illegible]ee buugaan.

## 17.Shirkad ka shaqeeso kireeynta guryaha Kiro services

Magaalada muqdisho waxaa ka shaqeesta dalaaliin aad ubadan kuwaas oo kala ijaara guryaha lknse waxaa aad u yar shirkad isku soo aruuriso dhamaan dalaaliinta guryaha ijaaro.

Macaamiisha guryaha ijaarato waxee u baahan yihiin hal meel oo eey la xariiraan meeshaas oo eey ka heli karaan gurya ijaar ah oo badan.

Hada badanaa maacaamiisha guryaha ijaarato kuma qanacsano dalaaleeyda maxaa yeelay qof ka dalaal ka ah kaliya wuxuu heli karaa dhowr guri oo kooban lknse hadii eey macaamiisha heli lahaayeen shirkad heli karta guryo badan oo ijaar ah oo macaamiisha eey ka dooran karaan midkii eey rabaan aad iyo aad ayee ugu qanacsanaan lahaayeen hooshaas weliba lacag macquul ah ayee ku bixin lahaayeen adeegaas.

## 18.Stock investment company

Wadankeena soomaaliya malahan shirkad iibiso saamiyada oo xitaa waxaa aad u yar shirkadaha bixiyo saamiyada.

Lknse waxaa saamiyo (stocks) ka iibsan kartaa wadamada hormaray adigoo jooga gurigaaga kaliya waxaa ubaahantahay internet iyo aqoon xaga maalgalinta ah.

Maalmahaan waxaa soo baxay goobo waxbarasho oo lagu barto maalgalinta goobahaas oo dadka bara sidii ee saamiyo uga iibsan lahaayeen internetka.

Sidoo kale waxaa heli kartaa muuqaalo badan oo ku jira youtube-ka muuqaaladaas oo kuu sharxaya sida loo iibsado saamiyada xaga internetka iyo sida baaritaan loogu suubiyo nuucyada saamiyada aad ka faaidi kartid iyo kuwa aad ku qasaari kartid iyo sidoo kale talooyin wanaagsan oo ku saabsan suuyada saamiyada dunida ugu caansan .

Run ahaantii fursadaan waa fursad aad iyo aad muuhiim u ah waxaana wanaagsanaan laheed in aad ka faaideesato.

## 19.Crypto-currency seller

Crypto-currency waxaa la yiraahdaa lacag aan waraaq aheen oo lagu keedsan karo computerka. Majirto cid Lacagtaas gooni u leh oo gooni usoo saarto waa lacag laga aqoon sanyahay hada dunida oo dhan oo aad internetka dhexdiisa wax uga iibsan karto

Crypto- currency waa lacago badan oo kala duwan lknse waxaa ugu caansan bitcoin lacagtaas mudo yar oo kooban ayaa qiimaheeda sare u kacay oo markii hore halkii bitcoin qiimaheeda wuxuu ahaa 8 doolar lknse qiimaheedu wuxuu noqday 20,000 dolar.

Dad badan ayaa ka taajiray iibinta lacagtaas oo waxeey iibsadeen lacagtaas mar eey raqiis aheed oo qiimaheeda kayaraa 100 dollar oo waxay iska iibiyeen mar eey qiimaheeda aheed 15000 dollar sidoo kale waxaa laga yaabaa in aad kamid noqoto dadkaas hadii aad fursadaan ka faaideesatid.

Hada waxaa jira goobo cryptocurrency lagu kala iibsado goobahaas oo ku yaala magaalada muqdisho.

## 20.Urur mideeya dalaaliinta

Soomaaliya kama jiro urur mideeya dalaaleeyda oo qof walba oo dalaal ah gooni ayuu u shaqeestaa.

Hadii aad sameeso urur mideeya dadka dalaalka ah waxaad ka heli kartaa faaidooyin badan oo aanan lasoo koobi karin.

Faaidooyinkaas waxaa kamid ah in aad suubisay hal meel oo dadka macaamiisha ah ugu soo hagaagi karaan dalaaleeyda oo eey ka heli karaan wixii warbixin oo eey uga baahan yihiin.

Dalaalnimada waxee kamid tahay shaqooyinka ugu fudud ee soomaaliya oo qof walba oo raba inuu iskiis isku shaqaaleesiiyo bilaabi karo lknse in la mideeyo dhamaan dadka dalaaliinta ah ma ahan howl fudud lknse qofkii la imaado siyaasado wanaagsan oo uu kusoo jiidan karo dadka dalaaliinta ah waxee u badan tahayin uu guulessto.

Su aasha isweediinta mudan ayaa waxee tahay yaa kaa faaideesan doono hooshaas oo bilaabo urur mideeya dalaaliinta.

## 21.Outsourcing company

Outsourcing waxaa la yiraahdaa in aad u qabato shirkadaha howl laga rabay in eey ayaga qabsadaan. Tusaale ahaan waxaa laga yaabaa shirkadaha xawaalada ah in eey u baahan yihiin shaqaalo dheeri bil walbo bilaawgeeda lknse eeysan awood u laheen in eey shaqaaleesiistaan shaqaalo dheeri ah markii hadii eey heli lahaayeen shaqaalo ku meel gaar ah bil walbo bilaawgeeda weey ijaaran lahaayeen

Sidaas oo kale si lamid ah shirkadaha waxee u baahan yihiin shaqaalo dheeri ah xiliyada qaar si eey u buuxshaan baahida macaamiisha marka hadii aad suubisid shirkad ka ijaarata shaqaalaha ganacsiyada magaalada muqdisho markii eey u baahan yihiin shaqaalo dheeri ah waa fursad wanaagsan oo ka banaan wadanka.

Sidoo kale adeegyada kale ee aad shirkadaha u qaban kartid waxaa kamid ah in aad la diyaarin kartid qorshayaasha iyo go aanada iyo wixii lamid ah.

Run ahaantii fursadaan waa fursad aad u weeyn oo u baahan in laga faaideesto

## 22.Business consultant

Wadankeena ma leh shirkad ku taqasustay oo qibrad u leh in eey la taliyaan shirkada magaalada mudisho xaga arimaha suuqgeeynta maalgalinta maamulka iyo maareenta.

Waxaa jira shirkado badan oo ka shaqeesto magaalada muqdisho oo aanan qibrad badan u laheeyn in eey maareeyaan ganacsiyadooda oo u baahan in eey helaan dad kala taliyo maamulka iyo maareeynta ganacsiga.

Sidoo kale waxaa jira shirkado badan oo u baahan in eey helaan fikrado ka duwan fikradahooda maamul iyo maareen si eey u hormariyaan ganacsigooda.

Waa fursad aad u weeyn oo ka banaan wadanka in aad bilaawdo shirkad la taliso ganacsiyada magaalada muqdisho.

Hadii aad u baahan tahay warbixin dheeri ah oo ku saabsan fikradaan ganacsi waxaad nagu soo booqan kartaa xaruunteena oo ku taala dhanka midig ee masjidka xareed ama waxaa naga soo wici kartaa teleefankeena oo ku qoran bage-ka hore ee buugaan.

## 23.Marketting company

Magaalada muqdisho maleh shirkad qaabilsan in eey soo diyaariyaan qorshe suuqgeeyn isla markaasna fuliyaan qorshahaas suuqgeyn.

Tusaale ahaan shirkad leh shaqaalo dhar u buufsan yihiin oo wadooyinka magaalada muqdisho ku xayeesiiyo goobaha ganacsiyada iyo sidoo kale u qeeybiyaan dadweeynaha waraaqaha xayeesiinta eey shirkadahu leeyihiin.

Suuqgeeynta waa qeebta ugu muhiimsan oo eey shirkad walba oo ku taalo magaalada muqdisho xooga saaraan si eey u hormariyaan ganacsiyadooda una soo jiitaan macaamiil badan. Waa fursad aad iyo aad u wanaagsan in aad bilaawdo shirkad ka shaqeeso suuqgeeynta oo xitaa waxee ubadantahay in aad guuleesato.

Hadii aad u baahan tahay warbixin dheeri ah oo ku saabsan fikradaan ganacsi waxaad nagu soo booqan kartaa xaruunteena oo ku taala dhanka midig ee masjidka xareed ama waxaa naga soo wici kartaa teleefankeena oo ku qoran bage-ka hore ee buugaan.

## 24.Private security company

Magaalada muqdisho ma lahan shirkad qaabilsan in eey ilaaliyaan amaanka shirkadaha yar yar iyo xaafadaha iyo weliba goobaha ganacsi xiliyada habeenkii ah.

Ganacsatada yar yar waxaa aad ugu adag in eey ijaartaan shaqaalo gooni ah oo amaanka u suga goobahooda ganacsi lknse hadii eey heli lahaayeen shirkad si raqiis ah ku siin karto shaqaalo amniga u ilaaliya goobahooda ganacsi xili walba gaar ahaan xiliyada habeenkii ah weey ubaahnaan lahaayeen.

In aad bilaawdo shirkad qaabilsan waardiyeenta goobaha ganacsi xiliyada habeenkii ah uma baahno qarash aad u fara badan lknse waxee u baahan tahay in aad xirfad u leedahay isku xirkad dadweeynaha hadaba su aasha isweediinta leh ayaa waxee tahay maxaa u bilaabi weeysay shirkad nuucaan ah.

## 25.Packaging company

Magaalada muqdisho malahan shirkad sameesa bacooyinka iyo kaartoonada lagu rido badeecadaha isla markaasna eey ku buufsan tahay shirkad walba magaceeda iyo wixii xayeesiin ah.

Hada ganacsatada waxee kasoo dhoofsadaan bacaha iyo kaartoonada wadanka shiinaha lknse hadeey heli lahaayeen shirkad tayo leh oo wadanka gudahiisa ku suubiso alaabtaas waxee u badan tahay in eey ka iibsadaan.

Teeda kale ganacsiyada yar yar awood uma lahan in eey soo dhoofsadaan badeeco lknse hadii eey wadanka gudahiisa ka heli karaan weey iibsan lahaayeen.

Sidaas owgeed in la bilaabo shirkad soo saarto alaabta badeecada lagu rido waa fursad muhiim ah o ka banaan wadanka.

## 26.Book publishing

Magaalada muqdisho waa ka jira madbacado badan oo buugaagta daawacaan lknse waxaa aad ugu yar shirkado buugaagta qoro oo markaas kadibna daawacdo buugaagtooda.

Hada magaalada muqdisho waxaa loo suubiyay goob lagu soo bandhigo buugaagta oo layiraahdo mogadisho book fair lknse wadanka maleh shirkad buugaagta qorto ama caawiso qoraayada buugaagta qoro sida editingka buugaagta qurxinta buugaagta iyo wixii adeeg ah oo lagu caawin karo qoraayaasha buugaagta.

Marka waa fursad aad u balaaran in aad bilaawdo shirkad buugaagta qorto oo daabacdo iyo sidoo kale ka caawisa qoraayaasha buugaagta in eey si wanaagsan u qoraan buugaagtooda.

## 27.Hr and recruitment assistant

Magaalada muqdisho waxaa ka jiro ururo yar yo oo qaabilsan xaga shaqaaleenta bulshada lknse majo shirkad si qaas ah uga shaqeeso shaqaaleenta dadka raba in eey shaqo helaan.

Shirkadaan waxee qaban kartaa in eey cv-yada u geeso dadka shaqa doonka ah meel walbo oo looga baahan yahay shaqaalo gaar ahaan hayadaha iyo shirkadaha.

Shaqa la,aan badan ayaa ka jirta magaalada muqdisho lknse sidoo kale waxaa jira fursado badan oo ka banaan hayadaha iyo shirkadaha marka hadii aad noqon kartid shirkad isku xirto dadka shaqa doon ka ah iyo kuwa shaqaale raadinayo waa hool aad muhiim ah gaar ahaan in aad dadka shaqo doon ka ah cv-yadooda u geeyso meel walba oo eey shaqo ka banaantahay.

## 28.Online Cooking school

Waxaa jiro shirkado badan oo online dadka wax ku baro qaabka cunta karinta lknse badankooda waxee ku yaalaan wadanka banaankiisa qaabka eey u shaqeeyaan waxee tahay in eey fiidiyoo soo duubaan isla markaasna soo dhigaan website-kooda lknse majiraan shirkad si online ah oo live ah dadka u baraan qaabka cunta karinta.

Markii aad bilaabeesid shirkad cunta karinta dadka si online ah ku barto micnaheeda maahan kaliya in aad barto sida loo kariyo cuntada aas aasiga ah lknse waa in aad bari kartaa cuntooyin badan oo casri ah sidoo kale waxaa tababaro u furi kartaa shaqaalaha ka shaqeeyo maqaayadaha iyo hoteelada.

Fursadaan waxaa ka faaideesan karo qofkii aqoon dheeri ah u leh qaabka loo kariyo cuntada aasaasiga ah iyo cuntada casriga ah ee laga isticmaalo guud ahaan dunida.

## 29.Property manager

Waxaa suubin karta shirkad u maamusho dadka ka boosaska oo ku nool wadanka dibadiisa oo waxaa u ilaali kartaa gurya-hooda sidoo kale waad u ijaari kartaa.

Dadka leh guryaha magaalada muqdisho iyo hareeraheeda waxee u badanyihiin dad qurba joog ah oo aanan wadanka imaan karin lknse hadii eey heli lahaayeen shirkad u maamusho guryahooda oo u ijaarto una ilaaliso ulana socoto xaalada gurigooda oo markasta u dirto sawiro muujinaya guryahooda weey u baahnaan lahaayeen oo waxeey ku bixin lahaayeen lacag bilkasta ama waxee qeeb uga tanaasuli lahaayeen lacagta uga soo xaooto gurigooda.

Marka waa fursad aad u weeyn in aad bilaawdo shirkad maamusho hanti maguurtada.

Fursadaan waxaa ka faaideesan karo qof dalaal ah kaas oo laga yaqaano guud ahaan wadanka islamarkaasna aad u dhaxgali karo bulshada oo ka dhaadhicin karo in uu hooshaan u qaban karo dadka milkiilayaasha ah.

## 30.Start youtube channel

Waxaa laga yaabaa in aad la yaabtay sababta aan ugu soo daray fursadaha banaan ee wadanka in aad bilaawdo youtube channel maxaa yeelay dadka soomaalida ah ee daawado youtebe-ka aad ayee u yaryihiin oo kama heleeysid hal malyan oo daawato fiidiyoowga aad soo dhigto youtube-ka.

Lknse fursada aan ka hadlaayo waxee tahay in aad suubiso youtube channel arimaha soomaliya uga sheekeenaya dadka ajaaniibta ah ee raba in eey wax ka ogaadaan arimaha Soomaaliya.

Waxaa jira dad badan oo ajaaniib ah oo raba in eey wax ka ogaadaan xaalada soomaaliya lknse eeysan heli karin meel eey ka daawadaan arimahaas.

Waxaad soo bandhigi kartaa goobaha quruxda badanee wadankaiyo goobaha dagaaladu aafeeyeen.

Sidoo kale waxaa kusoo bandhigi kartaa dukumantiyo ka hadlaayo arimaha soomaaliya dokumentiyadaas oo ku baxaaya luuqada ingiriiska.

## 31.On demand repair company

Magaalada muqdisho malahan shirkad ka shaqee cilad bixinta korontada biyaha tvyada iyo dhamaan qalabyada shirkadaas oo leh nambar lagala xariiro karo shirkadaas oo macaamiisha ugu tagto guryahooda.

Magaalada muqdisho waxaa kajiro xaruumo badan oo qaabilsan farsamada cilid bixinta qalabyada lknse majirto shirkad weeyn oo macaamiisha ugu tagto guryahooda markii eey u baahan yihiin shikadaas oo leh meelo eey macaamisha kala soo xiriiri karaan.

Fursadaan waa fursad aad u balaaran oo u baahan dad ka faaideesto. Walaal fursadaan ka faaideeso yeesan ku dhaafin waxee u badan tahay in uu guuleesato shirkadii hooshaan bilaawdo lknse shirkadaan waxaa bilaabi kara qof farsamo yaqaan ah qofkaas oo xirfad iyo xoogaa lacag ah heesta. Walaal waxaan ku dhihi lahaa hadii aad farsamo yaqaan tahay kafaaideeso fursadaan ganacsi oo bilaaw shirkad ka shaqeeso farsamayaqaanimo.

## 32. University counselling and training

Dadka waxbarto wadanka aad iyo aad ayuu u badan yihiin sidoo kale ardada iska diiwaan galiso jaamacadaha sanad walbo waxee gaaraayaan kumanaan kun oo qof ardadaas waxee u baahan yihiin dad kala taliyo jaamacadii eey bilaabi lahaayeen kuliyadii eey iska diiwaangali lahaayeen iyo sidoo kale macalimiin qibrad leh oo tababar iyo seminaaro ka siiso qaabka waxbarashada ee jaamacadaha.

Waxbarashada dugsiyada sare iyo waxbarashada jaamacada wee kala duwan tahay marka ardayda waxee u baahan yihiin in laga caawiyo xiligaas kala guurka ah ee kasoo gudbayaan dugi sare una gud bayaan jaamacada.

Fursadaan waxaa ka faaideesan karo ardayda dhigata jaamacadaha iyokuwa ka qalin jabiyay ardaydaas oo aad u firfircoon kuna fiican dhaxgalka bulshada.

Run ahaantii fursadaan waa fursad aad u balaaran oo muhiim ah oo eey fududahay in la bilaabo sidoo kale uma baahno qarash aadu badan si hooshaan loo fuliyo.

## 33. Used book reseler

Wadankeena malahan shirkad ka shaqeeso in ee ... oo iibsadaan buugaagta iyo slideyada celiska ah oo eey kasii iibiyaan ardada kale ee u baahan buugaagtaas. Ardada soomaaliyeed waxee u badan yihiin arday soo iibsato buugaagta ama daabacato slide-yada xiliyada waxbarasho lknse markii eey imtixaan galaan weey iska tuuraan buugaagtaas iyo slideyadaas. Sidoo kale waxaa jira dad badan oo aan lacag badan heesan oo u baahan buugaagtaas si eey wax ugu bartaan.

Marka waa fursad aad u balaaran in aad si raqiis ah kusoo iibsato buugtaas oo aad kasii iibisid ardada kale ee baahan oo raba in eey ka faaideestaan. In la bilaabo shirkad nuucaan oo kale ah uma baahno qarash badan kaliya waxee u baahan tahay xoogaa qarash ah iyo in aad xiriir wanaagsaan lasuubiso ardada.

Hadii aad u baahan tahay warbixin dheeri ah oo ku saabsan fikradaan ganacsi waxaad nagu soo booqan kartaa xaruunteena oo ku taala dhanka midig ee masjidka xareed.

## 34.Book club discussion

Book club discussion waxee tahay meel buugaagta looga doodo oo lagu niqaasho.Waxaad bilaabi kartaa goob lagu niqaasho buugaagta oo looga doodo isla markaasna si group ah buugaagta loo wado aqrisado.

In kastoo dadka soomaaliyeed kusoo baraarugeen waxbarashada hadana majirto goobo eey isugu tagaan oo ka wada naqaashaan buugaagta.

Qaabka ee shirkadaan u shaqeen karto waxee tahay in ardayda buug ka iib sadaan goobtaas islamarkaas buugaas si fiican gooni ugu soo aqristaan oo markeey soo aqristaan waxee imaanayaan xaruunta shirkada si eey uga doodaan ugana niqaashaan ardayda iyo macaalimiin kale oo qibrad u leh buugaas.

Waa fursad aad u wanaagsan maxaa yeelay waxaa jirta baahi badan oo loo qabo meel buugaagta si koox ah loogu aqristo sidoo kale goobtaas waxaa uga faaideesan kartaa in aad ku dhax iibidid shaaha iyo cabitaanka oo ka iibisid dadka soo booqanayaan goobtaas.

## 35.Shirkad turjumaan

Wadanka maleh shirkad ka shaqeeso in eey turjunto luuqadaha ingiriiska iyo carabiga oo eey u turjunto idaacadaha tv-yada website-yada iyo cidii u baahan in loo turjumo qoraalka eey rabaan.

Dhamaan idaacadaha wadanka maheestaan turjumaano badan oo qibrad wanaagsan u leh turjimada luuqada ingiriiska iyo carabiga oo xitaa hadii eey heestaan turjumaan lknse aad usoo bandhigto in aad u tarjumi kartid luuqadahaas si raqiis ah weey rabi lahaayeen.

Sidoo kale waxaa turjumaad u baahan hay'adaha kuwaas oo lacag badan ku baxsho shaqada turjumaanimada.

Run ahaatii waa fursad aad u balaaran in la abuuro shirkad turjumaanimada ka shaqeeso sidoo kalena uma baahno qarash aad u badan lknse waxee u baahan tahay shaqaale aqoon u leh luuqadahaas iyo suuqgeeyn aad u balaaran.

## 36.Maqaayad wareejisa Pizza

Wadanka waxaa aad ugu yar maqaayadaha suubiyo piza-ha lknse majirto shirkad piza-ha ugu geeyso macaamiisha guryahooda. Sidoo kale majirto shirkad wareejisa pizza-ha oo ku wareejisa wadooyinka magaalada muqdisho. Hadii aad xirfad u leedahay sida loo kariyo pizza macaan fadlan walaal yeesan ku dhaafin fursadaan oo ka faaideeso.

## 37.Flyer creation and distribution

Shirkad daabacdo istiikarada xayeesiinta iyo waraaqaha ogeeysiiska shirkadaas oo istiikarada ku dhajiso goobaha looga baahan yahay oo sidoo kale waraaqaha ogeeysiiska u qeeybiso dadweeynaha. Ganacsiyada magaalada muqdisho waxee xooga saaraan badanaa in eey daabacdaan istiikarada iyo waraaqaha ogeeysiiska hadana waxee ka xishoonayaan in eey qeebiyaan waraaqadahaas oo eey meel ku dhajiyaan ama waxaa laga yaabaa in eeysan waqti u heeynin in eey qeeybiyaan waraaqahaas.Marka waa fursad banaan in aad labadaas adeeg isugu wada qabatid oo macaashiisa si raqiis ah hooshaas ugu qabatid.

## 38.opinion polls company

opinion polls company waxee tahay shirkad codka(votes) u tirisa arimaha dadweeynaha iyo wixii lamid ah sida in aad cod u qaado boqolkiiba meeqa ayaa doowlada taageersan iyo meeqa ayaa kasoo horjeeda jaamacadee ardada ugu jecelyihiin shirkadee ugu fiican soo dhaweeynta macaamiisha iyo wixii lamid ah.

Aniga ahaan fursadaan waxee ila tahay fursadaha banaan mida ugu fiican oo la bilaabi karo kaliya waxaa loo baahan yahay in aad noqoto shirkad sumcad leh oo la aamini karo oo warbixinadeeda lagu kalsoonyahay.

Si aad u bilaawdo mashruucaan waxaa u baahantahay in aad xirfad u leedahay statistics softwares-ka sida spss iyo wixii lamid ah iyo sidoo kale in aad tahay qof bulshada xageeda sumcad ku leh oo warbixinada uu soo diyaariyo la aamino karo.

## 39.Survey creation company

Survey creation company waxaa ula jeedaa shirkad u diyaarisa ganacsiyada magaalada muqdisho in eey baaritaan ugu soo suubiyaan macaamiisha shirkada oo waraaqo questionaire ah u diyaariso kana soo buuxiso macaamiisha shirkada.

Dhamaan shirkadaha waa weyn ee magaalada muqdisho waxee u baahan yihiin shirkado usoo baaro macaamiishooda oo questionaira kasoo buuxsho.

Sidoo kale shirkada waxee qaban kartaa in eey ka caawiso shirkadaha kale ee rabo in eey baaritaan kusoo suubiyaan macaamiishooda.

Waxaa laga yaabaa in aad la yaaban tahay sababta aan ugu soo daray fursadaan fursadaha kabanaan magaalada muqdisho sababtaas waxee tahay suuqa hada waa isbadalay oo waxaa jira tartan u dhaxeeya shirkadaha tartankaas oo sababtay in shirkad walba ee survey kusoo suubido macaamiisha ka iibsato badeecadooda si eey baahidooda u haqabtiraan

## 40.Project Proposal writing

Waayahaan danbe waxaa aad usoo batay dhalinyaro rabaan in eey mashruucyo aas aasaan dhalinyaradaas oo aanan qibrad u laheyn sida loo diyaariyo proposals. Marka hadii aad tahay qof yaqaano luuqada ingiriiska oo qibrad u leh sida loo diyaariyo project proposal waxaan ku dhihi lahaa ka faaideeso oo furo meel bulshada loogu diyaariyo qorida proposal-ada

In la bilaabo mashruucaan uma baahno qarash aad u badan ee wuxuu u baahanyahay in aad tahay qof xirfad u leh sida loo diyaariyo mashruucyada oo aqoon u leh luuqada ingiriiska.

Run ahaantii fursadaan waa fursad aad u wanaagsan oo u baahan in laga faaideesto weliba waxyaabaha dheeriga aad ka heli kartid waxee tahay in aad adiga xitaa qorato mashruucyo oo aad dadka ka iibisid.

Hadii aad u baahan tahay warbixin dheeri ah oo ku saabsan fikradaan ganacsi waxaad nagu soo booqan kartaa xaruunteena oo ku taala dhanka midig ee masjidka xareed.

## 41.Multi level marketting

Multi level marketting waxee tahay suuq geyn heerar kala duwan leh oo eey shirkada qoraneesa shaqaalo suuqgeeye ah shaqaalahaas oo shirkada alaabta kasoo iibsada kadibna kasii iibiya macaamiisha sidoo kale shaqaalahaas waxaa laga rabaa in uu keeno shaqaale kale oo suuqgeeye ah sidoo kale shaqaale walba shaqaalihii uu keeno wax walba uu iibiyo wax ayuu ku leeyahay.

Suuqgeeynta waa baahida ugu balaaran oo eey shirkadaha u baahan yihiin marka hadii aad suubido shirkad multi-level marketting ah waxee u badan tahay in aad guuleesato. Si aad u bilaawdo shirkad nuucaan ah waxaad u baahan tahay in aad aqoon dheeri ah u leedahay qaababka suuq geeynta iyo sidoo kale in aad heesato xoogaa qarash ah oo aad ku bilaawdo.

Aniga ahaan waxee ila tahay fursadaan in ee tahay fursadaha ugu muhiimsan ee buugaan ku qoran hadii aad u baahan tahay warbixin dheeri waxaad ka heli kartaa internetka ama nagu soo booqo xafiiskeena oo ku yaala dhanka midig ee masjid xareed si aan kuu siino warbixino dheeri ah.

## 42.Video editing service

Muqdisho waxaa aad ugu yar shirkado suubiyo [illegible] iqaalda xayeesiinta iyo wixii lamid ah.

Dhamaan shirkadaha ka shaqeesta wadanka waxee u baahan yihiin muuqaalo xayeesiin ah oo eey ku xayeesiistan shirkadahooda islamarkaasna kasoo daayaan muuqaaladaas tv-yada iyo baraha bulshada.

Si aad u bilaawdo shirkadaan waxaa u baahan tahay in aad aqoon dheeri ah u leedahay qaababka loo suubiyo muuqaalada sidoo kale waxaa u baahan tahay suuq geyn balaaran oo aad u suuqgeeydo dhamaan ganacsiyada soomaaliya.

Hadii aad u baahantahay warbixin dheeri ah oo ku saabsan fikradaan ganacsi waxaad nagu soo booqan kartaa xaruunteena oo ku taala dhanka midig ee masjidka xareed ama waxaa naga soo wici kartaa teleefankeena oo ku qoran bage-ka hore ee buugaan.

## 43.Animation creation

Guud ahaan wadanka soomaaliya majirto shirkad suubido muuqaalada kaartoonada.

Hadii aad awood u leedahay in aad suubido muuqaalada kaartoonada waxaad ka faaideesan kartaa fursado badan fursadahaas oo ah in aad suubido sheekooyin iyo qisooyin afsoomaali ah oo qaab kaartoon(cartoon) ahaan u duuban iyo sidoo kale waxaa suubin kartaa xayeesiimo badan oo kaartooma ah.

Hadii aad u baahan tahay warbixin dheeri ah oo ku saabsan fikradaan ganacsi waxaad nagu soo booqan kartaa xaruunteena oo ku taala dhanka midig ee masjidka xareed ama waxaa naga soo wici kartaa teleefankeena oo ku qoran bage-ka hore ee buugaan.

Sidoo kale hadii aad u baahantahay meelo aad ka barato xirfadaas ah sida loo suubiyo muuqaalada kaartoonada waxaad ka baran kartaa internetka oo waxaa jira shirkado badan oo dadka bara sida loo suubiyo muuqaalada kaartooma

## 44.Online library

Waayahaan danbe waxaa aad u soo kordhay wa... ...rashada wadanka dhamaan ardada waxee u baahan yihiin buugaag eey wax ka bartaan iyo buugaag eey wax ka aqristaan lknse ardeydaas awood uma lahan in eey iibsadaan buugaag.

Sidaas darteed waxaa jirta baahi weeyn oo loo qabo online library (maktabad online ah) maktabadaas oo laga heli karo buugaag badan isla markaasna eey aradada iyo macalimiinta si raqiis ah ku heli karaan maktabadaas.

In la bilaabo online library howl fudud maahan maxaa yeelay waxaa loo baahan yahay buugaag aad iyo aad ubadan buugaagtaas oo aan wadanka laga heli karin.

Sidoo kale waxaa ku baxaayo qarash aad u badan oo ah sameeynta website casri ah oo maktabad ah iyo heli taanka dhamaan buugaagta loo baahan yahay.

Sidoo kale waxaa qarash aad u badan ku baxaayo suuqgeynta maktabadaas online-ka ah lknse waa fursad wanaagsan oo qofkii lacag heestaa uu ka faaideesan karo.

# Fikradaha ku saabsan Wax soo saarka (production).

Waayahaan danbe waxaa aad usoo xoogeestay tartan u dhaxeeya in badeecada lasoo dhoofsado iyo in wadanka gudahiisa lagu soo saaro waxaa jira badeecooyin badan oo wadanka soo dhoofsan jiray lknse hada wadanka gudahiisa lagu suubiyo sidoo kale waxaa jira badeecooyin badan oo wadanka gudahiisa lagu suubin jiray lknse hada lasoo dhoofsado.

Waxaa jira fursado badan oo banaan oo ah in wadanka gudahiisa lagu soo saaro badeecooyin badan oo aanan hada wadanka gudahiisa lagu soo saarin

Waxaa suurtagal ah in aad soo dhoofsan karto mashiinadii lagu soo saari lahaa badeecada isla markaasna aad wadanka ka heli karto shaqaalo raqiis ah oo xirfad u leh in eey ka shaqeeyaan mashiinadaas. Sidoo kale waxaa wadanka ka heli kartaa alaabta ceeriinka ah (raw materials) oo aad badeecadaas kusoo saari kartid.

Ganacsiga warshadaha yaryar (light industry) ayaa hadda waxaa ay noqdeen fursadaha ugu fiican ee ganacsi ee laga samayn karo wadanka. Waxaana marba marka ka dambaysa soo badanaaya baahida loo qabo in gudaha lagu soo saaro badeecadda halkii dibada laga keeni lahaa taas oo keenta in badeecaddu jabnaato lana helo shaqaale aad u jaban.

Halkaan waxaa kugu soo gudbineenaa fursado badan oo ka banaan wadanka oo aad maalgashan karto oo ah in aad soo saarto badeecooyin badan oo wadanka looga baahan yahay.

## 46.Shirkad soo saarto ukumaha doorada.

Wadankeena waxaa ku yar shirkad si qaas ah usoo saarto ukumaha taasina waxee sababtay in ukumaha qaali noqdaan oo halkii xabo lagu iibiyo maqaayadaha 6000 oo shilin soomaali ah.

Xiliba xiliga ka danbeeya waxaa isbadala farsamooyinka caalamka oo hada waxaa la heli karaa farsamooyin badan oo kuu sahli kara in aad soo saarto ukumo aad ubadan waliba si raqiis ah.

Hadii aad heesatid lacag fiican oo aad ku maalgashan karto mashiino casri ah iyo farsamooyin cusub kuwaas oo kuu sahli kara in aad suubisid warshad lagu soo saaro ukumaha doorada oo  raqiis ah ka faaideeso.

Hadii aad u baahan tahay warbixin dheeri ah oo ku saabsan fikradaan ganacsi waxaad nagu soo booqan kartaa xaruunteena oo ku taala dhanka midig ee masjidka xareed ama waxaa naga soo wici kartaa teleefankeena oo ku qoran bageka hore ee buugaan.

## 47.Shirkad xanaaneeso doorooyin badan oo kadib kasii ganacsato.

Guud ahaan soomaaliya ma jirto beer lagu xanaaneeyo doorooyinka yar yar beertaas oo heesata ilaa kumanaan kun oo dooro. Waayahaan danbe doorooyinka waxaa laga soo dhoofsadaa dalka brazil maxaa yeelay brazil waxee leedahay beero badan oo lagu xanaaneeyo doorooyinka. Beeraha lagu xanaaneeyo doorooyinka yar yar ee jiijiilka ah waxee leeyihiin daawooyin iyo cunto u gooni ah oo la siiyo doorooyinka kuwaas oo u sahlo in eey isla markiiba koraan oo eey hilbo badan yeeshaan

Fursadaan waxaa ka faaideesan karo qofkii lacag heesto maxaa yeelay waxaa loo baahan yahay dhul aad u balaaran oo dhismo gooni loo dhiso iyo in aad soo iibsato kumanaan doorooyin ah oo aad meesha ku xanaaneeso.

Hadii aad u baahan tahay warbixin dheeri ah oo ku saabsan fikradaan ganacsi waxaad nagu soo booqan kartaa xaruunteena oo ku taala dhanka midig ee masjidka xareed.

## 48. Warshad soo saarto caano booro qasan oo sajaleesan

Magaalada muqdisho waxaa aad ugu soo kordh... shirkado ka shaqeeya caanaha geela sida soolis iilis iyo k..wa kale oo badan lknse magaalada muqdisho ma laga helaayo shirkad soo qasto caana booraha kadibna sajaleeso.

Caana booraha waxee aad iyo aad uga raqiisan tahay caanaha kale taas oo sababtay in eey dad badan isticmaalaan lknse hada waxaa suuqa lagu gadaa oo kaliya caano booro budo ah lknse kama heleesid suuqa caano booro la qasay oo sokor lagu daray oo baceesan.

Waxaa jira dad badan oo isugu jiro waa weeyn iyo yar yar kuwaas oo u baahan in eey iibsadaan caano booro sajaleesan lknse eeysan jirin cid u diyaarisay caanahaas.

Su aasha waxee tahay yaa ka faaideesan doono? Maka faaideesan doontaa oo ma bilaabi doontaa shirkadii ugu horeesay oo hooshaas bilaawdo. Fursadaan waxaad ku bilaabi kartaa xaafada aad dagan tahay kadibna si tartiib tartiib ah ayaa ku kordhin kartaa.

## 49.Sameynta faraantiyaasha.

Waayahaan danbe waxaa aad usoo kordhay romantiga dadka soomaaliyeed oo waxeey aad isigu hadiyeeyaan faraantiyada ayaga oo raba in eey faraantiga ku qoraan magaca qofka eey jecelyihiin.

Wadanka aad iyo aad ayee ugu yar tahay shirkad suubiso faraantiyada nuucaas ah sidoo kale waa fursad aad u balaaran oo u baahan in laga faaideesto.

Si aad u bilaawdo shirkad nuucaan ah waxaa u baahan tahay in aad aqoon u leedahay qaabka loo suubiyo faraantiyada.

Hadii aad u baahan tahay warbixin dheeri ah oo ku saabsan fikradaan ganacsi waxaad nagu soo booqan kartaa xaruunteena oo ku taala dhanka midig ee masjidka xareed ama waxaa naga soo wici kartaa teleefankeena oo ku qoran bage-ka hore ee buugaan.

## 50.Cabitaanka Khudaarta wadanka Gudahiisa Lagu Sameeyo.

Hareeraha waddooyinka magaaladda Muqdisho waxaa kusoo kordhay dhalinyaro sameyso cabitaanka nooc-yadiisa kala duwan kuwaas oo cabitaan ahaan looga iibiyo dadka, waana ganacsi si maalinle ah loogu shaqeysto shiiditaanka cabitaanka laga sameeyo khudaarta dalka ka soo go'da.

Ganacsatadan yar yar ayaa isticmaala hab ka duwan qaabkii awal cabitaanka loo sameyn jiray, dadkana looga iibin jiray qofka isaga oo taagan ayaa cabitaanka nooca khudaarta uu doonayo ayaa loo shiidayaa, ganacsatadaan dhalinyarada ah khudarta waxaa ay ka keenaan gobalka Shabeelaha hoose oo caan ku ah khudarta nooc-yadeeda kala duwana laga soo saaro.

Dhanka kale macaamiisha iibsata cabitaanka khudaarta laga sameeyo ayaa aad u ammaanay, iyaga oo sheegay in cabitaanka dalka uu leeyahay dhadhan dabiici ah, oo aad u wanaagsan, faa'idana u leeyahay caafimaadka jirka. Marka waa fursad aad u wanaagsan oo ubaahan in laga faaideesto.

## 51.Shirkad ka shaqeeso in eey qashinka iyo waxyaabaha la tuuray dib u warshadeeso kadibna ka ganacsato.

Waayahaan danbe dhamaan wadamada aduunka waxeey xooga saareen sidii eey u yareen laheen waxyaabaha aanan u wanaag-saneen deegaanka.

Hadii aad suubidid shirkad dib u warshadeeyda qashinka isla markaasna kasoo saarto waxyaabo dadka anfacaayo oo dib u iibiso waxaad heli kartaa faaido ah alaabta aad iibisay iyo sidoo kale waxaad heli kartaa hay'ado ku caawiyo oo kuugu taageero hoosha aad qabaneesid sidoo kale waxaa laga yaabaa in eey dowlada ku caawiso.Marka laga soo tago lacagaha faaidada ah ee aad hesho sidoo kale waxaa ku dheer in aad bulshada iyo deegaanka u qabatay howl muhiim ah oo eey u baahnaayeen. Hadii aad aqoon u leedahay in aad dib u warshadeeydo qashinka oo aad kasoo saarto badeeco kale oo bulshada anfici karto waxaa ku dhihi lahaa ka faaideeso fursadaan hadii aadan aqoon ulaheena sida dib loo warshadeeyo waxa[illegible] jira hay'ado badan oo ka caawiya hooshaas ganacsata[illegible] isku day in aad kasoo barato hay'adahaas.

## 52.Shirkad suubiso kabaha (kabo loo ubiyay qaabka dhaqanka ee soomal a)

Wadan walba wuxuu ilaashadaa Hidaha iyo dha anka uu wadankaas leeyahay lknse dadka soomaaliyeed ma ahan dad tix galiyo hidaha iyo dhaqanka wadankooda inkastoo waayahaan danbe isbadal weeyn dhacay oo ee dadka soomaaliyeed bilaabeen in ee tixgaliyaan hidahooda iyo dhaqankooda.

Waa fursad aad u muhiim ah in aad suubiso kaba loo sameeyay qaabka hidaha iyo dhaqanka soomaaliyeed fursadaana muhiimadeeda kaliya ma ahan in aad lacag ka hesho ee waxaad ku heli kartaa sumcad badan oo ah in aad wadankaaga sharaftiisa kor u qaaday. Sidoo kale waayahaan waxaa aad usoo batay wadaninimada dadka soomaaliyeed kuwaas oo jecel in eey iibsadaan alaabta hidaha iyo dhaqanka ee wadanka gudahiisa lagu suubiyay.

Hadii aad u baahan tahay warbixin dheeri ah oo ku saabsan fikradaan ganacsi waxaad nagu soo booqan kartaa xaruunteena oo ku taala dhanka midig ee masjidka xareed.

## 53.Shirkad suubiso saliyada darimaha iyo roogaga hidaha iyo dhaqanka soomaaliyeed.

Xirfada aan u leenahay sida loo suubiyo agabka Hidaha iyo Dhaqanka waa xirfad gabaabsi ku dhow oo dadkii ehelka u ahaa waxay ku kala foofeen shaqooyin kala duwan oo ay ka barteen nolosha, qaarkoodna iskuulo u galeen.

Wadan kastaa wuxuu ku faanaa waxa uu Hidaha iyo Dhaqanka u leeyahay ee u gaarka ah oo ah awoodda laga qiyaaso wax-soo-saarka iyo ilbaxnimada bulsho kasta oo caalamka ku nool. Waa fursad wanaagsan oo u baahan qof ka faaideesto inkastoo eey u baahan tahay xirfad weeyn hadana waxaan isleeyahay xirfadaas waxaa jira dad badan oo yaqaano oo aad shaqaaleesiisan karto.

Sidoo kale waayahaan waxaa aad usoo batay wadaninimada dadka soomaaliyeed kuwaas oo jecel in eey iibsadaan alaabta hidaha iyo dhaqanka  ee wadanka gudahiisa lagu suubiyay.

Hadii aan nahay soomaali waxaan ubaahanahay in aan helno shirkad weeyn oo soo saarto agabka hidaha iyo dhaqanka.

## 54.Shirkad suubiso nashqado kala duwan oo cover mobile ah.

Galka lagu daboolo moobilada waxaa laga soo dhoofsadaaa dalka china lknse galkaas ma lahan nashqado aad u qurux badan oo ah hidaha iyo dhaqanka soomaaliyeed.

Sidoo kale galalkaas moobilada waxaad ku nashqadeen kartaa qof walba magaciisa.

Hadii aad u baahan tahay warbixin dheeri ah oo ku saabsan fikradaan ganacsi waxaad nagu soo booqan kartaa xaruunteena oo ku taala dhanka midig ee masjidka xareed ama waxaa naga soo wici kartaa teleefankeena oo ku qoran bage-ka hore ee buugaan.

Sidoo kale xirfadaan waxaad kabaran kartaa muuqaalada youtube-ka oo waxaa jira muuqaalo badan oo aad ka heli kartid youtube-ka kuwaas oo kuu sharxayo sida loo suubiyo galka moobilada.

## 55.Naqshadeynta Dharka Dumarka

Gabdhaha naqshadeeya dharka dumarka waa kuwa ku yar guud ahaan Soomaaliya, waxaana suuragal ah in gobolo badan oo dalka ka mid ah aanan laga helin. Sidaa darteed inta badan gabdhaha Soomaaliyeed waxaa ay ku labistaan dhar lagu soo naqshadeeyay dalka dibaddiisa

Naqshadeynta waxaa asal u ah ama aad ku base-gareeyn kartaa asturnaanta oo dhar gabdhaha Soomaaliyeed asturaya. Waxaadna sameeyn kartaa xijaabyo iyo dhar isqaadanaya oo qofka asturaya sidoo kalena qurxinaya.

Waxaa caqabad kugu noqon kara qaabka suuqgeynta dharka. Dharka iyo naqshadaha aad sameyso waxaa kusoo bandhigi kartaa oo kaliya baraha bulshada gaar ahaan bog gaar ah oo aad Facebook ku leedahay.

Sidoo kale waxaad suubin kartaa muqdisho fashion show oo lagu soo bandhigi doono dharka aad nasgqadeeyda si dadka soomaaliyeed uwada arkaan nashqadaada.

## 56.Shirkad si jumlo ah usoo saarto cuntada fudud (fast foods) kadibna ka iibisa dhamaan maqaayadaha.

Ka ganacsiga cuntada wuxuu kamid yahay ganacsiyada ugu faaidada badan ee wadanka maxaa yeelay cuntada waa wax uu qof walba u baahan yahay maalin kasta.

Dhamaan maqaayadaha ku yaalo magaalada muqdisho ayaga ayaa suubisto cuntada fudud eey iibiyaan sida sambusiga, burka,macsarada iyo wixii lamid ah lknse aad ayee u wanaagsanaan laheed hadii la heli lahaa shirkad si jumla ah usoo saarto saambuuska iyo macsarada iyo wixii lamid ah shirkadaas oo si tayo leh oo macaan u suubiso isla markaasna ku iibisa lacag ka yar lacagta eey maqaayadaha ku sameestaan cuntadaas.

Cuntada hadii loo suubiyo si jumlo ah waxaa yaraanaayo qarashkii lagu suubin jiray maxaa yeelay mar walba oo wax badan la suubiyo oo si jumla ah lagu soo gato qudaarta lacag yar ayaa ku baxeeso.

## 57.Frozen agricultural foods

Waxaa jira waxyaabo lagu daro qudaarta si eeysan qudaartaas u halaabin oo eey u ooli karto mudo aad u badan.

Marka fursada banaan waxee tahay in aad soo iibsatid qudaarta kadibna ku dartid waxyaabo sababaya ineeysan halaabin mudo aad u badan kadibna aad gasaceeysid.

Sidaad ogtahay qudaarta kasoo go'da soomaaliya mar marka qaar waa la waayaa roob la'aan awgeed ama abaaro ama jidka oo xirmay ama tacabkii soo go.i jiray sanadkaas oo hoos u dhacay markii hadii la waayo qudaarta wadanka waxaa loo baahan yahay qudaar sajaleesan oo laga iibiyo dadka soomaaliyeed. Run ahaantii fursadaan waa fursad aad u muhiimsan oo u baahan in laga faaideesto.

Hadii aad u baahan tahay warbixin dheeri ah oo ku saabsan fikradaan ganacsi waxaad nagu soo booqan kartaa xaruunteena oo ku taala dhanka midig ee masjidka xareed ama waxaa naga soo wici kartaa teleefankeena oo ku qoran bage-ka hore ee buugaan.

## 58.Beer malaay lagu xanaaneeyo

Soomaaliya waxaa mar marka qaar ku yaraada kaluunka badda midaas oo sababta in uu qaali noqdo kaluunka.

Sidaas darteed Wadanka wuxuu u baahan yahay berkado waa weyn oo layiraahdo berkedaha xayawaanka ku waasi oo lagu xanaaneeyo xayawaanka kaluunka.

Isla Mar ahaantaasina ka samaysan muraayado wax laga dhex'arki karo oo loogu tala galay inay dadku ka dhex arkaan wax ku jira si ay wax uga ogaadaan siyaabaha kala duwan ee xayawaanka kaluunku ugu dhex-noolyahay biyaha dhex-dooda sidoo kalena uga qaataan muqaalo kala duwan iyo waliba sawiro.

Berkadaas waxee noqon kartaa meel loo dalxii tago sidoo kale meel lagu keediyo kaluunka si loo iibiyo xiliyada uu qaaliga noqdo.

Run ahaantii in mashruucaan la hirgaliyo aad iyo aad ayuu qaali u yahay lknse waxee ku wanaagsanaan laheed qofkii lacag heestaa in uu ka faaideesto.

## 59.Dairy milk sida yogurt

Waxaa aad noogu yar warshadaha suuubiyo yogurt oo ah wax sidii caanaha oo kale ah lknse dhanaan oo aad u macaan waxaa badanaa laga isticmaalaa qurbaha.

Lknse majirto muqdisho shirkad si jumlo ah uu suubiso yogurt marka run ahaantii waa fuursad banaan oo u baahan in Laga faaiideesto.

Hadii aad u baahan tahay warbixin dheeri ah oo ku saabsan fikradaan ganacsi waxaad nagu soo booqan kartaa xaruunteena oo ku taala dhanka midig ee masjidka xareed ama waxaa naga soo wici kartaa teleefankeena oo ku qoran bage-ka hore ee buugaan.

Sidoo kale hadii aad u baahan tahay in aad barato sida loo suubiyo yogurt waxaa jira muuqaalo badan oo laga heli karo barta youtube-ka muuqaaladaas oo sharxaya sida loo suubiyo yogurt.

**60.School milk production and distribution network**

Iskoolada dugiyada hoose iyo dhexe waxaa dhigto arday badan oo soomaaliyeed kuwaas oo u baahan xiliyada bareega ah (break time) waxeey cunaan iyo cabaan.

Caanaha sida caana booraha waa dookha ugu horeeya oo eey u baahan yihiin iyada oo eey jirto baahidaas hadana ma jirto shirkad si jumla ah u diyaarisa caana booraha kuwaas oo u qeeybisa dugsiyada hoose iyo dhexe.

Hada iskoolada waxaa u shaqeeya maamooyin si gooni gooni ah cuntada ka iibiya iskoolada soomaaliyeed lknse ma jirto shirkad si jumla ah u suubiso oo xiriir wanaagsan la leh dhamaan iskoolada ku yaalo wadanka. Hadii aad mashruuucaan bilaawdo waxaa laga yaabaa in  aad maalgalin iyo deeq ka hesho hay.adaha joogo soomaaliya kuwaas oo raba in eey caawiyaan ardada soomaaliyeed.

Hadii aad u baahan tahay warbixin dheeri ah oo ku saabsan fikradaan ganacsi waxaad nagu soo booqan kartaa xaruunteena oo ku taala dhanka midig ee masjidka xareed.

## 61.Bisbaas production

Bisbaaska wuxuu kamid yahay waxyaabaha eey dadka cuntada ku darsadaan badanaa oo cuntada aad u macaaneeya. Dhamaan maqaayada soomaaliya waxee miis walba oo cunto lagu cuno ku diyaariyaan bisbaas la tumay kaas oo aan aad u macaaneen.

Magaalada muqdisho waxaa ka banaan fursad weeyn oo ah shirkad si qaas ah uu suubisa bisbaas aad macaan oo jumlo ah islamarkaasna si raqiis ah ugu qeeybisa maqaayadaha iyo hoteelada ku yaalo magaalada muqdisho. Cuntada hadii loo kariyo si aad u ubadan oo qudaarta lagu soo iibsado si jumla ah kadibna hal meel lagu kariyo waxaa aad iyo aad u yaraan-aayo qarashka ku baxaayo. In la bilaabo shirkad nuucaan ah waxee uu baahan tahay in aad xirfad gooni ah u leedahay qaabka loo suubiyo bisbaas qaas ah oo aad u macaan ama aad shaqaaleesato shaqaalo hooshaas qaban karo. Hooshaan uma baahna qarash aad ubadan in lagu bilaabo lknse waxee u baahan tahay xoogaa qarash ah oo aad bisbaaska ku suubisid iyo xoogaa qarash ah oo aad ku suuq geeydid.

## 62.Cunto la warshadeeyay sida potato chips

Waayahaan danbe maqaayadaha waxee bilaabeen in eey suubiyaan chips-ka sidoo kale waxaa jira dad badan oo aad u jecel chips-ka dadkaas oo mar walba iibsada.

Iyadoo eey jirto baahi badan oo loo qabo chips sajaleesan hadana majirto wadanka shirkad gasaceeydo chips-ka shirkadaas oo si jumlo ah uga iibisa ama u qeeybisa maqaayadaha magaalada muqdisho.

In la bilaabo mashruucaan wuxuu u baahan yahay xoogaa qarash ah oo aad ku suubisid warshad gasaceeyda chips-ka sidoo kale chips-ka waxaa laga suubiyaa baradho baradhadaasna waa qaali oo waxaa laga soo dhoofiyaa dalka itoobiya.

Sidoo kale chips-ka kaliya lagama suubiyo baradhada sidoo kale waxaa laga suubin karaa qudaar kale oo badan oo waxaa loo suubin karaa nuucya badan oo kala gadisan oo waxaa loo karin karaa nuucya badan oo kala gadisan. Waxaan kugula talin lahaa intii aadan bilaabin mashruucaan in aad baaritaano dheeri ah ku suubisid qaababka kala duwan ee loo suubiyo chips-ka

## 63.Chocolate tea and cofee

Dadka Soomaliyeed waxee u badan yihiin dad aad iyo aad u isticmaala shaaha nuucyadiisa kala duwan lknse majirto shirkad shaaha ka suubiso shukalaato shirkadaas oo shaahaas u qeeybisa maqaayadaha ama wareejisa shaahaas o u geeysa macaamiisha.

Dadka Soomaaliyeed aad iyo aad ayee ujecelyihiin wixii cusub oo waxeey kuu maah maahaan wixii cusub caalamka ayaa jecel sidaas oo eey tahay wadanka wuxuu u baahan yahay shirkad suubisa nuucya kala duwan oo shaah ah oo eey ka suubiso waxyaabo badan oo kala duwan waxyaabahaas waxaa kamid ah in shaaha laga suubiyo shukulaato aad u macaan oo tayo badan.

Sidoo kale mashruucaan kuma baxaayo qarash badan in la suubiyo lknse waxaa qarash badan ku baxaayo in la suuq geeyo.

Waxaa loo baahanyahay in aad suubisid shaah gooni ah isla markaasna leh magac gooni ah (brand name) oo tayo leh.

## 64.Animal feeding company

Xoolaha sida ariga geela iyo lo'da waxee cunaan coos lknse waxaa jira xiliyo eey abaaro ka dhacaan wadanka xiliyadaas oo eey xoolaha waayaan wax eey cunaan.

Hadii la heli lahaa shirkad keedisa cunta raqiis ah oo eey xoolaha cuni karaan islamarkaasna iibisa cuntadaas xiliyada eey abaaraha jiraan wee wanaagsanaan laheed.

Fursadaan waa fursad wanaagsan oo qof walba oo soomaaliyeed bilaabi kara kana faaideesan karo.

Hadii aad u baahan tahay warbixin dheeri ah oo ku saabsan fikradaan ganacsi waxaad nagu soo booqan kartaa xaruunteena oo ku taala dhanka midig ee masjidka xareed ama waxaa naga soo wici kartaa teleefankeena oo ku qoran bage-ka hore ee buugaan.

## 65.Warshad saabuun iyo oomo

Waxa jira wadanka saabuuno iyo oomo badan oo kala duwan oo loo soo dhoofiyo wadanka lknse majirto saabuun ama oomo wadanka gudahiisa lagu suubiyay.

Waxaa layaab ah sababta saabuunta iyo oomada wadanka gudahiisa loogu suubin waayay iyadoo eey aad u fududahay sida loo suubiyo xitaa waxaa ka baran kartaa youtube-ka sida loo suubiyo sidoo kale chemicals-ka laga suubiyo waa kiimikooyin laga heli karo meel walba.

Sababtaas waxee tahay dadka soomaaliyeed ma jecla in eey wax suubiyaan oo xitaa wadanka gudahiisa laguma suubiyo istikiin iyadoo istakiinka ee tahay oo kaliya geed la jar jaray. Iyadoo eey aad u fududahay in la suubiyo saabuunta iyo oomada ayaa hadana waxaa ka soo dhoofsanaa wadanka banaankiisa.

Waxaan aad u jeclaan lahaa in uu qof soomaaliyeed ku dhiirado in uu bilaabo warshad nuucaan ah.

## 66.Warshad istakiin

Waxaa ceeb nagu ah hadii aan nahay dad soomaliyeed xitaa in aan soo dhoofsano istakiin iyadoo eey aad u fududahay sida loo suubiyo istakiinka weliba aan leenahay geedo aad u badan oo aan ka suubin karno.

Kaliya waxaa u baahantahay in aad raadsato mashiin kuu jarjara geedaha oo kaaga dhiga qaabka cabirka istakiinka xitaa ganacsigaan waxaa bilaabi kartaa adigoo jooga gurigaaga oo gurigaaga dhexdiisa ayaa ku suubin kartaa.

Sidoo kale uma baahna qarasha aad u badan si aad u bilaawdo ganacsigaan ee waxaa u baahantahay qarash yar oo ku suubsato ama kusoo iibsato mashiinka kuu jarjaraayo geedaha iyo sidoo kale qarash kaaga baxaayo suuqgeynta.

Hadii aad ganacsigaan bilaawdo waxaad heli kartaa xayeesiin badan in eey kuu suubiyaan dadka soomaaliyeed kuwaas oo aad u jecel horumarka wadanka iyo hal abuurnimada ganacsiga. Waxaan aad ugu faraxsanaan lahaa in la helo qof sooma- aliyeed oo fursadaan ka faaideesta.

## 67.Warshad daawo caday

In la suubiyo daawo caday uma baahno aqoon aad u badan sidoo kale uma baahno mashiino aad qaali u ah waxaa jira kiimikooyin la isku daro oo laga suubiyo daawada cadayga.

Hada dadka soomaaliyadeed badanaa ma isticmaalaan daawada cadayga maxaa yeelay aad ayee qaali u tahay sidoo kale suuqa waxaa yaala daawooyin dhacay iyo kuwa faalsa ah oo raqiis ah lknse daawooyinka originaalka ah waa qaali.

Hadii aad suubiso daawo caday oo laga suubiyay dhirta wadankeena ee carafta badan waxee u badan tahay in eey dadka soomaaliyeed iibsadaan maxaa yeelay daawooyinka kale waxee ku naceen kiimikooyin ayaa laga suubiyay.

Shirkada nuucaan waxee u baahan tahay in aad aqoon dheeri ah u leedahay daawo dhireedka wadanka iyo in aad suuq geeyn aad u balaaran u suubiso.

Aniga ahaan waxee ila tahay fursadaan ganacsi in eey ka mid tahay fursadaha ugu wanaagsan ee buugaan ku qoran.

# Fikradaha ku saabsan wax soo dhoofsiga (Import)

Waayahaan danbe suuqa aad iyo aad ayuu isku badalay oo ganacsatadii ilbax ayee noqdeen waxaa suurta gashay in qof walba oo lacag yar xitaa heesta in uu soo dagsan karo(import) alaab walba oo ganacsi uu u baahan yahay maxaa yeelay wadanka waxaa kusoo kordhay shirkado badan oo soo dhoofiyo alaabta.

Waayihii hore suuqa bakaaro suurtagal ma aheen in uu qof walba wax soo dhoofsado dad kooban oo taajiriin ah ayaa ganacsatada lacag kasoo aruurin jirtay kadibna alaabta eey rabaan usoo dhoofin jiray lknse maanta wax walba wee isbadaleen qof walba wuxuu heli karaa websites uu alaabta kasoo iibsado iyo mastercard uu lacagta ku baxsho iyo shirkado alaabta usoo qaado (shipping companies).

Sidoo kale uma  baahnid in aad dibada aado si aad alaab usoo iibsato badeeco walba oo aad u baahanytahay waxaad warbixinteeda ka heli kartaa internetka sidoo kale internetka dhexdiisa ayaa ka iibsankartaa.

Websiteyada aad alaabta warbixinteeda ka ogaan kartid kagana soo iibsan kartid waxaa ka mid ah.

1. Alibaba.com
2. Aliexpress.com
3. Dhgate.com
4. Ebay.com
5. Amazon.com

Shantaas website aan kor kusoo sheegnay waa websiteyada ugu waaweyn ee alaabta laga soo dagsado siiba websiteka aliexpress.com waa website eey alaabta kala soo dagsadaan(import) ganacsatada yar yar ee rabo in eey lacag yar kusoo dagsadaan badeecada ee rabaan

Halkaan waxaa idinkugu soo gudbineenaa fursado badan oo banaan oo aad badeecooyin aan dalka laga heleenin kusoo dagsan karto.

## 68.Shirkad soo dhoofiso ukumaha doorada

Waayihii hore suuqa bakaaro suurtagal ma aheen in uu qof walba wax soo dhoofsado dad kooban oo taajiriin ah ayaa ganacsatada lacag kasoo aruurin jirtay kadibna alaabta eey rabaan usoo dhoofin jiray lknse maanta wax walba wee isbadaleen qof walba wuxuu heli karaa websites uu alaabta kasoo iibsado iyo mastercard uu lacagta ku baxsho iyo shirkado alaabta usoo qaado (shipping companies).

Maadaama eey fududatay in aad soo dagsan karto badeecadii aad ubaahan tahay oo eey suuqa ka jirta baahi ah in lahelo ukumo raqiis ah waxaa fursad banaan ah in aad soo dagsato ukumo raqiis ah oo aad usoo dagsato si jumlo ah kadibna kasii iibisid ganacsatada kale ama maqaayadaha. Lknse in aad si jumlo ah usoo dhoofsato ukumaha waxee u baahan tahay qarash aad u badan oo waxaa ka faaideesan karo fursadaan oo kaliya qofkii lacag fiican heesta. Hada suuqa waxaa laga helaayaa ukumo wadanka gudahiisa lagu suubiyay iyo shirkado wax yar oo ukuma ah soo dagsado lknse majirto shirkad si jumlo ah ukeenta ukumaha wadanka gudahiisa.

## 69.Shirkad soo dhoofsato doorooyinka

Waayihii hore suuqa bakaaro suurtagal ma aheen in uu qof walba wax soo dhoofsado dad kooban oo taajiriin ah ayaa ganacsatada lacag kasoo aruurin jirtay kadibna alaabta eey rabaan usoo dhoofin jiray lknse maanta wax walba wee isbadaleen qof walba wuxuu heli karaa websites uu alaabta kasoo iibsado iyo mastercard uu lacagta ku baxsho iyo shirkado alaabta usoo qaado (shipping companies).

Maadaama eey fududahay in aad soo dagsan karto badeecadii aad u baahan tahay oo eey suuqa ka jirta baahi ah in lahelo doorooyin raqiis ah waxaa fursad banaan ah in aad soo dagsato doorooyin raqiis ah oo aad usoo dagsato si jumlo ah kadibna kasii iibisid ganacsatada kale ama maqaayadaha. Lknse in aad si jumlo ah usoo dhoofsato doorooyinka waxee u baahan tahay qarash aad u badan oo waxaa ka faaideesan karo fursadaan oo kaliya qofkii lacag fiican heesta. Hada suuqa waxaa laga helaayaa doorooyin wadanka gudahiisa lagu xanaaneeyay iyo shirkado wax yar oo doorooyin ah soo dagsado lknse majirto shirkad si jumlo ah ukeenta doorooyinka wadanka gudahiisa.

## 70.In aad soo dagsato finger print flash

Dadka Soomaaliyeed waxee u badan yihiin dad jecel wixii cusub oo waxeey ku maahmaahaan wixii cusub caalamkaa jecel. Sidaas oo eey tahay wadanka gudahiisa lagama helaayo falaashyo u baahan in farta ama suulka lasaaro si uu shaqeeyo oo wixii ku jira falaashka gudahiisa u furmaan.

Hadii aad uu baahan tahay falaashkaas in aad lasoo dagto waxaa kala soo dagi kartaa website-yadaan soo socda.

1. Alibaba.com

   Marka hore gal website kaan oo ku qor finger print flash kadibna aqri wixii warbixin ah.

2. Aliexpress.com

   Sidoo kale gal website kaan oo ku qor finger print flash kadibna aqri wixii warbixin ah.

3. Dhgate.com

   Sidoo kale gal website kaan oo ku qor finger print flash kadibna aqri wixii warbixin ah.

4. Sidoo kale waxaa ka fiiri kartaa website-yadaan amazon.com iyo ebay.com

## 71.In aad soo dagsato earphone with a micro phone

Sidoo kale wadanka malaga helaayo dhago dhagahaas oo leh microphone si qofka markuu u hadlaayo loo maqlo. Dhagaha(earphone) hada yaalo wadanka ma lahan microphone casri ah oo weey adagtahay in uu ku maqlo qofka aad la hadleesid hadii ee dhago kuugu jiraan moobilka.

Hadii aad u baahan tahay in aad soo dhoofsato dhagaha nuucaan ah waxaad ka heli kartaa website-yadaan

1. Alibaba.com

   Marka hore gal website kaan oo ku qor earphone with a microphone kadibna aqri wixii warbixin ah.

2. Aliexpress.com

   Sidoo kale gal website kaan oo ku qor earphone with a microphone kadibna aqri wixii warbixin ah.

3. Dhgate.com

   Sidoo kale gal website kaan oo ku qor earphone with a microphone kadibna aqri wixii warbixin ah.

## 72.Shirkad soo dagsato dhar nuucyo gooni ah

Suuqyada muqdisho sanadadaan danbe waxaa laga bilaabay shirkado soo dagsado kaliya nashqado gooni ah oo aanan dalka horey looga arag si eey u iibiyaan xiliyada iidaha.

Fursadaan waxaa ka faaideesan kara qofkii qibrad u leh nashqadaha dharka sidoo kale aad ukala yaqaano macaamiisha iibsado dharka iyo nashqadaha eey jecel yihiin.

Hadii aad la timaado nashqad wanaagsan oo soo jiidato dadka soomaaliyeed waxaa ka heli doontaa faaido aad u badan oo waxaa jiro dad badan oo ka faaiday nashqado eey ku iibiyeen suuqa bakaaraha.

Hadii aad u baahan tahay warbixin dheeri ah oo ku saabsan fikradaan ganacsi waxaad nagu soo booqan kartaa xaruunteena oo ku taala dhanka midig ee masjidka xareed ama waxaa naga soo wici kartaa teleefankeena oo ku qoran bage-ka hore ee buugaan. Sidoo kale hadii aad u baahan tahay in aad hesho nashqado qurux badan waxaa ka raadin kartaa internka iyo meelaha lagu soo bandhigo nashqadaha dharka islaamiga ah.

## 73.Shirkad dhoofiso badeecadaha wadanka

Waxaa jira qeeyraad badan uu wadankeena leenahay sida qudaarta iyo xoolaha oo ah badeecada ugu badan ee aan doofino. Lknse waxaa jira fursada badan oo banaan oo aanan aheen in la dhoofiyo qudaar ama xoolo fursadaas waxee tahay in wadanka gudahiisa laga suubiyo warshado lagu suubiyo cabitaano lagu suubiyay qudaarta wadankeena aadka u macaan kadibna cabitaanadaas la gasaceeyo oo loo dhoofiyo wadanka dibadiisa.

Fursadaan waxaa ka faaideesan karo oo kaliya ganacsatada heesato lacago badan kuwaas oo qibrad u leh ganacsiga.

Sidoo kale waxyaabaha la dhoofin karo waxaa kamid ah adeegyada sida xaga internetka dhexsiisa lagu suuubin karo.

Hadii aad u baahan tahay warbixin dheeri ah oo ku saabsan fikradaan ganacsi waxaad nagu soo booqan kartaa xaruunteena oo ku taala dhanka midig ee masjidka xareed ama waxaa naga soo wici kartaa teleefankeena oo ku qoran bage-ka hore ee buugaan.

## 74.Solar powered chargers batteries funs

Korontada oo aad qaali u ah awgeed dadka soomaaliyeed waxee u baahan yihiin qalab ku shaqeeya qoraxda weliba waxaa kuu sii dheer hadii aad soo dagsato qalab ku shaqeeya korontada waxaad heli doontaa xayeesiimo lacag la aan ah maxaa yeelay idaacadaha sida bbc-da laanta af soomaliga ah waxee jeceshahay in eey dhiiro galiso arimaha nuucaan ah oo kale. Si aad usoo dagsato badeecadaan waxaad ka heli kartaa webside-yadaan soo socdo.

1. Alibaba.com

   Marka hore gal website kaan oo ku qor Solar powered chargers batteries funs kadibna aqri wixii warbixin ah.

2. Aliexpress.com

   Sidoo kale gal website kaan oo ku qor Solar powered chargers batteries funs kadibna aqri wixii warbixin ah.

3. Dhgate.com

   Sidoo kale gal website kaan oo ku qor Solar powered chargers batteries funs kadibna aqri wixii warbixin ah.

## 75.Solar fridges

Waxaa aad iyo aad qaali u ah korontada oo soomaaliya waxee kamid tahay wadama eey korontada ugu qaalisan tahay sidoo kale waxaa jirta baahi aad u balaaran oo eey bulshada u baahan yihiin in eey helaan faranjiyeero si eey ugu keed-sadaan qudaarta oo eey ugu qaboojiyaan caabitaanka maxaa yeelay soomaliya waa wadan eey cimiladiisa aad u kulu-shahay. Si baahidaas loo xaliyo bulshadu waxeey u baahan yihiin faranjiyeero ku shaqeeya qoraxda si aad u soo dhoofsato faranjiyeeradaas ka fiiri website-yadaan

1. Alibaba.com

   Marka hore gal website kaan oo ku qor solar fridges kadibna aqri wixii warbixin ah.

2. Aliexpress.com

   Sidoo kale gal website kaan oo ku qor solar fidges kadibna aqri wixii warbixin ah.

3. Dhgate.com

   Sidoo kale gal website kaan oo ku qor solar fridges kadibna aqri wixii warbixin ah.

## 76.Battery powered funs (marawaxad batari ku shaqeesa)

Wadanka soomaaliya waa wadan eey cimiladiisa aad u kulushahay oo eey ugu sii darantahay bilaha maarso iyo abril. kuleeykaas awgeed dadka soomaaliyeed waxee aad iyo aad u raadiyaan marawaxado lknse korontada ayaa aad qaali uh marka dadka badanaa ma isticmaalaan marawaxada lknse hadii eey heli lahaayeen marawaxad ku shaqeesa battari waxee u badantahay in eey iibsadaan. Marawaxa-dahaas waxaa kala soo dagi kartaa website-yadaan

1. Alibaba.com

   Marka hore gal website kaan oo ku qor Battery powered funs kadibna aqri wixii warbixin ah.

2. Aliexpress.com

   Sidoo kale gal website kaan oo ku qor Battery powered funs kadibna aqri wixii warbixin ah.

3. Dhgate.com

   Sidoo kale gal website kaan oo ku qor Battery powered funs kadibna aqri wixii warbixin ah.

## 77.Steam path (meel markii aad gasho dhidid kaa keeneeso oo kuleeyl ah)

Dadka soomaaliyeed waxee dhahaan wixii cusub caalamkaa jecel sidoo kale waxee u baahan yihiin goobo eey u dalxiis tagaan oo eey ka helaan wax eey hore u arki jirin sida steam path oo ah meel markuu qofka galo uu dareemayo kuleeyl kuleylkaas oo sababi doono in uu dhidido oo wixii wasaq ah oo jirkiisa ku dhagnaa ka fuqdo.

Hadii aad u baahantahay in aad soo dagsato steam path waxaa gashaa website-yadaan soo socdo.

1. Alibaba.com

   Marka hore gal website kaan oo ku qor Steam path supplies kadibna aqri wixii warbixin ah.
2. Aliexpress.com

   Sidoo kale gal website kaan oo ku qor Steam path supplies kadibna aqri wixii warbixin ah.
3. Dhgate.com

   Sidoo kale gal website kaan oo ku qor Steam path supplies kadibna aqri wixii warbixin ah.

## Fikradaha ku saabsan Internet-ka and IT-ga

Sanado ka hor suurtagal ma noqon laheen in aan ka hadalno fursad ka banaan adeega internetka iyo IT maxaa yeelay waxaa wadanka aad ugu yaraa isticmaalka internetka oo xitaa bulshada ma eeysan fahansaneen muhiimada eey leedahay internetka iyo IT ga.

Lknse waayahaan danbe waxaa aad iyo aad usoo kordhay isticmaalka internetka gaar ahaan social mediaha sida facebook taas oo sababtay in baahi badan loo qabo fikrado la xariira adeegyada internetka iyo information technology(IT).

Halkaan waxaa idin kugu soo gudbineenaa fursado badan oo ka banaan isticmaalka adeegyada internetka gaar ahaan social media iyo information technology.

## 78.E-commerce

Shirkada ugu qaalisan dunida waa shirkad ku iibisa badeecada internetka dhexdiisa shirkadaas waxaa la yiraahdaa Amazon. Markii amazon la bilaabay waxaa aad u yareed dadka raba in eey internetka dhexdiisa wax ka iibsadaan maxaa yeelay macaamiisha aad uma fahansaneen faaidada laga heli karo in eey internetka dhexdiisa wax ku iibsadaan. Sidaas si lamid ah dadka soomaaliyeed hada diyaar uma ahan in eey internetka dhexdiisa waxka iibsadaan lknse si tartiib tartiib ah ayee ugu baahnaan doonaan in eey internetka dhexdiisa wax ka iibsadaan.

Hadii aad hada bilaawdo shirkad internetka dhexdiisa badeecada ku iibisa waxaa u baahantahay in aad ku tala gasho in aad eey kugu qaadaneeso mudo in aad macaamiil badan hesho lknse hadii aad dulqaadato oo aad sugto mudo badan oo aad mar walba ku tala gasho sidii aad ku hormarin laheed adeegaaga waxee u badan tahay in aad guuleesato oo aad noqoto mid kamid ah shirkadaha ugu weeyn wadanka soomaaliya.

## 79.Last minute shipping company

Waxaa jiro badeecooyin iyo adeegyo badan oo hadii aanan la isticmaalin halaabaayo ama dhacaya(expire).

Adeegyadaas ama badeecadahaaas waxaa kamid ah tikidada oo hadii aanan diyaarada la buuxin boosaskeeda aan la heli doonin faaido badan.

Marka waxaa loo baahanyahay shirkad iibisa tikidada diyaarahadah xiliyada ugu danbeeya oo eey diyaarada duuli rabto iyadoo shirkadaas ku iibineeysa tikidadaas lacag raqiis ah. Sidoo kale waxaa iibin kartaa tikidada basaska aado gobolada xilga ugu danbeesa uu baskaas safri rabo.

Hadii aad u baahan tahay warbixin dheeri ah oo ku saabsan fikradaan ganacsi waxaad nagu soo booqan kartaa xaruunteena oo ku taala dhanka midig ee masjidka xareed ama waxaa naga soo wici kartaa teleefankeena oo ku qoran bage-ka hore ee buugaan. Fursadaan waxaa ka faaideesan karo agenciyada ka shaqeeyo wadanka maxaa yeelay agenciyadaas kuma baxeeso lacag badan in eey ka faaideestaan fursadaan.

## 80.Website iibiyo buugaagta.

Ardada soomaaliyeed waxee u badan yihiin arday soo iibsato buugaagta ama daabacato slide-yada xiliyada waxbarasho gaar ahaan markii  eey imtixaan galayan.

Sidoo kale waxaa jira dad badan oo aan lacag badan heesan oo u baahan buugaag si eey wax ugu bartaan.

Marka waa fursad aad u balaaran in aad si raqiis ah kusoo iibsato buugtaas oo aad kasii iibisid ardada kale ee u baahan in eey ka faaideestaan buugaagtaas.

In la bilaabo shirkad nuucaan oo kale ah uma baahno qarash badan kaliya waxee u baahan tahay xoogaa qarash ah iyo in aad xiriir wanaagsaan lasuubiso ardada.

Hadii aad u baahan tahay warbixin dheeri ah oo ku saabsan fikradaan ganacsi waxaad nagu soo booqan kartaa xaruunteena oo ku taala dhanka midig ee masjidka xareed ama waxaa naga soo wici kartaa teleefankeena oo ku qoran bage-ka hore ee buugaan.

## 81.Web design

Haddii aad aqqoon u leedahay sidda wax loo qurxiyo "design" waxaa jiro websiteyo badan oo u baahan arintaan in loo qabto. Waxaad la xariir kartaa websiteyada u baahan hawshaan adigoo u sheegaayo aqqoonta aad u leedahay hawshaan iyo sidda aad ugu guulaysani karto.

Waayahaan danbe Dhamaan shirkadaha waxeey isku dayooyaan in eey suubsadaan website-yo si eey macaamiisha uga aqristaan wixii warbixin ah oo eey u baahan yihiin.

Lknse shirkadaha badankooda aqoon uma leh sida loo suubiyo website-yo qurux badan kuwaas oo soo jiita macaamiisha sidoo kale waxee u baahan yihiin web hosting.

Si aad ganacsigaan u bilaawdo waxaa u baahan tahay in aad aqoon dheeri ah u leedahay sida loo suubiyo website-yada iyo sidoo kale waxaa u baahan tahay in aad suuqgeeyn balaaran suubiso. Walaal waxaan ku dhihi lahaa hadii aad aqoon u leedahay sida loo suubiyo website-yada ka faaideeso aqoontaada oo u badal ganacsi aad lacag ka hesho.
adigoo gurigaada joogo ayaad raadini kartaa macaamil.

Waxaad marka horre raadini kartaa websiteyada u baahan in shaqadaas loo qabto, kadibna raadi emaila-dooda iyo teleefoonadooda. Waxaa kale oo aad u baahantahay kombuyuuter "computer", internet, iyo barnaamijka sofwere-ka aad ku qabani lahayd hawshaas. Kadibna la imaaw qaabka aad wax ugu dhaadhicin lahayd shirkadaha leh website-yadaas.

Hadii aad u baahan tahay warbixin dheeri ah oo ku saabsan fikradaan ganacsi waxaad nagu soo booqan kartaa xaruunteena oo ku taala dhanka midig ee masjidka xareed ama waxaa naga soo wici kartaa teleefankeena oo ku qoran bage-ka hore ee buugaan.

### 82.Suubinta applicationada moobilada

Magaalada muqdisho waxee u baahan tahay shirkad suubida applications lagu isticmaalo moobilada applications-kaas oo eey kamid yihiin kuwa lagu duubay tafsiirka quraanka axaadiista iyo kuwa kale oo ah barashada luuqada ingiriiska iyo sidoo kale applications ku qoron yihiin barashada taariikda wadankeena iyo wixii lamid ah.

## 83.Online photo editing firm

Wayahaan danbe waxaa aad usoo batay dadka isticmaalo facebuuga kuwaas oo mar walba soo dhigo sawiro. Lknse waxeey u baahnaan lahaayeen shirkad si online ah eey ugu diraan sawirada inta eeysan soo dhigin facebuuga si sawiradaas loogu qurxiyo photoshop ahaan..

Dadka Soomaaliyeed waxee u badan yihiin dad aad u jecel in eey is qurxiyaan gaar ahaan markii eey rabaan in eey sawira-dooda soo dhigaan facebuuga lknse hada majirto shirkad sawirada u qurxiso si photoshop ahaan ah shirkadaas oo sawirada loogu soo diro internet ahaan kadibna qurxisa sawiradaas oo dib ugu dirto internet ahaan qofkii lahaa sawiradaas. Fursadaan waxaa ka faaideesan kara qof walba oo yaqaana sida loo isticmaalo photoshop oo xitaa ganac-sigaaan waxaad bilaabi kartaa adiga oo jooga gurigaaga. Hadii aad u baahan tahay warbixin dheeri ah oo ku saabsan fikradaan ganacsi waxaad nagu soo booqan kartaa xaruunteena oo ku taala dhanka midig ee masjidka xareed ama waxaa naga soo wici kartaa teleefankeena oo ku qoran bage-ka hore ee buugaan.

## 84.Online book selling

Maalmahaan dambe waxaa sii kordhaayo tirada ardayda Soomaaliyeed, waxayna ardayda inta badan raadiyaan buugaagta kuwa ugu dambeeyay "last edition" dabcan dadkeena waxay aad u jecel yihiin waxyaabaha cusub. Ka faa'ideyso waa fursad qaali ah.

Marka waa fursad aad u balaaran in aad si raqiis ah kusoo iibsato buugtaas oo aad kasii iibisid ardada kale ee u baahan in eey ka faaideestaan buugaagtaas.

Hadii aad u baahan tahay warbixin dheeri ah oo ku saabsan fikradaan ganacsi waxaad nagu soo booqan kartaa xaruunteena oo ku taala dhanka midig ee masjidka xareed ama waxaa naga soo wici kartaa teleefankeena oo ku qoran bage-ka hore ee buugaan.

## 85.Online assignment and research preparation firm

Wadanka Soomaaliya waxaa jira malaayiin arday Soomaaliyeed ardaydaas oo dhigata iskoola kala duwan iyo maadooyin badan oo kala duwan. Ardaydaas badanaa waxaa loo diraa assignmentiyo aad u badan iyo in eey diyaariyaan cilmibaaris mar walba oo eey ka qalin jabinayaan jaamacdaha. Lknse ardaydaas waxee u baahan yihiin shirkad kala diyaariso assignmentiyadaas iyo cilmi baaristaas si online ahaan ah oo ardaydaas waxee baahidooda kuugu soo qori karaan internetka kadibna markaad u diyaariso wixii eey rabeen waxaa ugu diri kartaa si internet ahaan ah.

Fursadaan kaliya waxee u baahantahay in aad aqoon u leedahay sida loo diyaariyo assignmentiyada iyo cilmi-baarista xitaa ganacsigaan waxaad bilaabi kartaa adiga oo joogo gurigaaga.

Hadii aad u baahan tahay warbixin dheeri ah oo ku saabsan fikradaan ganacsi waxaad nagu soo booqan kartaa xaruunteena oo ku taala dhanka midig ee masjidka xareed ama naga soo wac taleefankeena.

## 86.Digital marketting company

Suuqgeyn waxaa layiraahdaa in adeegyada iyo badeecadaha shirkada lagaarsiiyo macaamiisha oo laga iibiyo.Suuqgeeynta waa qeebta ugu muhiimsan oo eey shirkad walba xooga saarto gaar ahaan waayahaan danbe shirkadaha waxeey bilaabeen in eey isku xayeesiiyaan facebuuga si eey macaamiisha u ogeeysiiyaan adeegooda.

Sababta eey muhiim u tahay in shirkada walbo suubsato facebuug page oo eey ku xiranyihiin kumanaan qof waxaa kamid ah. Macaamiisha shirkad walba sida ganacsatada shirkadaha ardada dhamaantood waxee isticmaalaan facebuug. Facebuug waa meesha kaliya ee shirkada isku xayeesiin karto oo eey ku gaarsiin karto xayeesiinteeda malaayiin qof si raqiis ah

Inkastoo eey jirto baahi aad u badan baahidaas oo ah shirkad xayeesiin xaga facebuuga ah shirkadaas oo ka caawisa shirkadaha kale in eey helaan followers aad u badan iyo in eey u share-gareeyaan shirkad walba postiga eey soo dhigto facebuuga.

## 87.Personal blog

Hadii aad tahay qof aqoon dheeri ah leh ama qibrad gooni ah u leh maado ama aqoon eey bulshada u baahan tahay waxaad suubsan kartaa personal blog oo aad soo dhigto warbixino muhiim ah. Waxaa jiro dad badan oo falaanqeeya arimaha siyaasada waxbarashada iyo wixii lamid ah hadii aad kamid tahay dadkaas waxaan kugula talin lahaa inaad suubsato personal blog.

In aad personal blog suubsato waa lacag la aan kaliya waxaa u baahan tahay in aad tahay qof wax qori kara oo aqoon leh. Sidoo kale waxaad bilaabi kartaa adiga oo joogo gurigaaga.

waxaa isweediin mudan sidee lacag uga suubin kartaa fikradaan hadaba waxaa lacag ku heli kartaa in aad website-kaaga iyo qoraalkaaga ku xayeesiido shirkadaha.

Hadii aad u baahan tahay warbixin dheeri ah oo ku saabsan fikradaan ganacsi waxaad nagu soo booqan kartaa xaruunteena oo ku taala dhanka midig ee masjidka xareed ama waxaa naga soo wici kartaa teleefankeena oo ku qoran bage-ka hore ee buugaan.

## 88.Data recovery and backup services

Shirkadaha waaweeyn ee muqdisho ka shaqeeyo waxee u baahan yihiin shirkad u keeydisa data-dooda oo back up u sameeysa hadii eey ka lunto data-dooda.

Sidoo kale shirkadaha waa weeyn waxee u baahan yihiin meel eey si online ah ugu keedsadaan data-dooda si eey u helaan data-dooda meel walba oo eey joogaan.

Fursadaan waxaa ka faaideesan karo qof aad iyo aad u yaqaano computer science islamarkaasna heesto xoogaa lacag ah.

Hadii aad u baahan tahay warbixin dheeri ah oo ku saabsan fikradaan ganacsi waxaad nagu soo booqan kartaa xaruunteena oo ku taala dhanka midig ee masjidka xareed ama waxaa naga soo wici kartaa teleefankeena oo ku qoran bage-ka hore ee buugaan.

# Fikradaha ku saabsan Saxaafada

Dadka qaar ayaa waxee dhahaan soomalida oo dhan waa weriyaal oo waxeey meel walba oo eey fadhiistaan ka faafiyaan wararka sidoo kale baahida eey u qabaan wararka aad iyo aad ayee u badan tahay.

Waxaa jira fursado badan oo ka banaan xaga suxifinimada wadanka sida shirkado soo saaro baarnaamijyada taariikhda isla markaasna soo turjunta documentariyada eey diyaariyeen shirkadaha saxaafada ee aljaziira cnn dw documentaries nova documentries iyo bbc documentaries.

Fursadaha aan halkaan idinkugu soo gudbineeno waxee u baahanyihiin aqoon xaga saxaafada ah iyo aqoon xaga luuqada ingiriiska ah.

Buugaan waxaa idin kugu soo gudbineenaa fursado badan oo ka banaan saxaafada wadankeena.

## 89.Shirkad soo turjumto dokumentariyada eey diyaariyeen warbaahinada caanka ah.

Dadka soomaliyeed waa dad aad u jecel in eey dhageestaan ama daawadaan siyaasadaha iyo taariikhda dunida. Sidoo kale bulshada soomaaliyeed badanaa ma fahmi karaan luuqada ingiriiska oo badanaa dokumentiriyada ku qoran yihiin luuqadaas.

Waxaa jira dokumentiriyo aad ubadan oo eey diyaariyeen idaacadaha iyo telefishanada sida bbc cnn iyo aljazeera. dokumentariyadaas waxee ka hadlayaan siyaasadaha iyo taariikhda wadama aduunka oo dhan.

Hadii aad soo turjunto dokumentiriyadaas waxaa kusoo bandhigi kartaa youtube-ka ama idaacadaha iyo telefishanada wadankeena.

Hadii aad u baahan tahay warbixin dheeri ah oo ku saabsan fikradaan ganacsi waxaad nagu soo booqan kartaa xaruunteena oo ku taala dhanka midig ee masjidka xareed ama waxaa naga soo wici kartaa teleefankeena oo ku qoran bage-ka hore ee buugaan.

## 90. Waxaad noqon kartaa wariye madax banaan (freelance)

Waxaad noqon kartaa joornaalista xor ah "freelance" waxaa jiro ganacsato u baahan in loo qoro warbixinta sanadlaha ah.

Haddii aad aqqoon duruqsan u leedahay siyaasadda iyo diblomaasiyada waxaad sameyni kartaa inaad sameysato website oo aad ku bixini karto koorsooyin si lagaaga iibsado aqqoontaada, waxaad kale oo aad qori kartaa dhibaatooyinka haysata siyaasiyiinta iyo sidda ay ugu gudbi karaan. Waana shaqo galabkii illaa habeenkii aad ka shaqeyn karto shaqadaada caadiga kadib.

Waa fursad wanaagsan oo aan kaaga baahneen lacag badan oo kaliya u baahan in aad aqoonu leedahay saxaafada.

Hadii aad u baahan tahay warbixin dheeri ah oo ku saabsan fikradaan ganacsi waxaad nagu soo booqan kartaa xaruunteena oo ku taala dhanka midig ee masjidka xareed ama waxaa naga soo wici kartaa teleefankeena oo ku qoran bage-ka hore ee buugaan.

## 91.Shirkad qaabilsan soo saarista madadaalo sheekooyin iyo waxyaabo muhiim ah oo anfaco bulshada.

Soomaalida waa dad aad u jecel madadaalada oo waxeey aad u dhageestaan sheekooyinka iyo gabayada. Sidoo kale dadka soomaaliyeed waxeey aad u daawadaan musalsalada oo waxay ka daawadaan telefishanada.

Sidaas oo eey tahay majirto shirkad si qaas ah usoo diyaarisa sheekooyin iyo musalsalo oo eey dadka soomaaliyeed udaawadaan si joogta ah.

Shirkad nuucaan oo kale ah waxaa bilaabi karo abwaano iyo qof hal abuuri kara sheekooyinka islamarkaasna suuqgeeyn kara sheekooyinka iyo musalsalada uu diyaariyay.

Hadii aad u baahan tahay warbixin dheeri ah oo ku saabsan fikradaan ganacsi waxaad nagu soo booqan kartaa xaruunteena oo ku taala dhanka midig ee masjidka xareed ama waxaa naga soo wici kartaa teleefankeena oo ku qoran bage-ka hore ee buugaan.

# Fikradaha ku saabsan waxbarashada

Wadanka waxaa ka jira baahi badan oo eey bulshada u qabaan waxbarashada oo qof walba wuxuu jecelyahay in uu wax barto lknse sidaas si lamid ah meelkasta waxaa ka furan goob waxbarasho oo gaabaha  waxbarasho aad iyo aad ayee u badanyihiin.

Inkastoo xaalada wabarasho sidaas tahay hadana waxaa jira fursado badan oo ka banaan adeega waxbarashada wadanka.

Fursadaas waxee u badan yihiin fursado cusub isla markaasna si qaas  ah ugu adeegeeso qeeybo kamid ah bulshada soomaaliyeed.

Buugaan waxaa kugu soo gudbineenaa fursado badan oo cusub oo ka banaan adeega waxbarashada wadankeena ee soomaliya waxaa rajeenaa in fursadahaas ku anfici doonaan insha allah.

## 92.Training school waxbarasho gooni ah baxsho

Wadan waxaa aad ubadan iskoolada ku yaala magaalada muqdisho sidoo kale waxaa aad u badan ardada u baahan in eey waxbartaan.

Maadaama eey aad u badatay iskoolada waxbarashada bixiya waxaa loo baahan yahay iskoolada dadka baro waxbarasho qaas ah. Waxbarashadaas qaaska ah waxaa kamid ah

- ✓ Farsamada gacanta
- ✓ Kuliyada maalgalinta
- ✓ Kuliyada suuqgeenta
- ✓ Iyo waxbarasho walba oo qaas ah oo aanan laga helin wadanka gudahiisa.

Hadii aad u baahan tahay warbixin dheeri ah oo ku saabsan fikradaan ganacsi waxaad nagu soo booqan kartaa xaruunteena oo ku taala dhanka midig ee masjidka xareed ama waxaa naga soo wici kartaa teleefankeena oo ku qoran bage-ka hore ee buugaan.

## 93.Online school

Waayahaan danbe waxaa aad iyo aad usoo kordhay isticmaalka internetka.sidoo kale waxaa jira dad badan oo aad u mashquulsan kuwaas oo aanan soo xaadiri karin galaas lknse u baahan in eey waxbartaan.

Wadanka wuxuu u baahanyahay iskoolo iyo jaamacado si online ah dadka wax ku baro

Online iskoolkaas waxaad bulshada ku bari kartaa maada kasta oo eey u baahan yihiin

Sidoo kale waa fursad raqiis ah inla bilaabo uma baahnid qarash aad u badan kaliya waxaa u baahan tahay website aad u qurux badan iyo macalimiin iyo suuq geeyn aad u balaaran.

Hadii aad u baahan tahay warbixin dheeri ah oo ku saabsan fikradaan ganacsi waxaad nagu soo booqan kartaa xaruunteena oo ku taala dhanka midig ee masjidka xareed ama waxaa naga soo wici kartaa teleefankeena oo ku qoran bage-ka hore ee buugaan.

## Fikradaha kusaabsan Caafimaadka

Waxaa jira baahi badan oo loo qabo goobo caafimaad wadanka sidoo kale waxaa jira shirkado badan oo qaabilsan haqabtirka caafimaadka wadanka.

Sidaas oo eey tahay waxaa jira fursado badan oo ka banaan adeegyada caafimaadka wadanka gaar ahaan daaweeynta caruurta maxaa yeelay adeegyada caafimaad waxee ubadanyihiin adeega daaweeynta caruurta.

Buugaan waxaa idinkugu soo gudbineenaa fursado badan oo ka banaan adeegyada caafimaadka ee wadanka fursadahaas waxee u badanyihiin kuwo ku saleesan adeegyada caafimaadka caruurta iyo haweenka gaar ahaan xaga ceemiska caafimaadka caruurta oo ah fursad weyn oo ka banaan adeegyada caafimaadka ee wadanka.

## 94.Health care insurance firm for children

Dhaqaatiirta ugu badan ee wadanka ka shaqeeya waa dhaqaatiirta caruurta sidoo kale caruurta waa kuwa ugu baahida badan isbitaalada

Maadaama eey caruurta mar walba loo geeyo isbitaalada magaalada muqdisho waxee u baahan yihiin ceemis (insurance).

Ceemiskaas oo ah in caruurta inta eey yar yihiin loo balan qaado in eey heli doonaan isbitaalo lacag la aan ah taas badalkeedana eey waalidiintooda bixin doonaan lacag raqiis ah bil-walba.

Hadii aad u baahan tahay warbixin dheeri ah oo ku saabsan fikradaan ganacsi waxaad nagu soo booqan kartaa xaruunteena oo ku taala dhanka midig ee masjidka xareed ama waxaa naga soo wici kartaa teleefankeena oo ku qoran bage-ka hore ee buugaan.

## 95.Nambar gooye isbitaalada si raqiis ah

Waxaa jira isbitaalo badan oo ka shaqeeya magaalada muqdisho sidoo kale waxaa jira baahi badan oo loo qabo goobaha caafimaadka wadanka. Qof walba oo ubaahan goob caafimaad marka hore waa in uu goostaa naambar lacagtiisa eey tahay 10 dollar si uu u tago dhaqtarka.

Waxaa jira dad badan oo ku laablaabta goobaha caafimaadka dadkaas oo baxsho lacag aad u badan oo eeysan awood u laheen in eey bixiyaan. Marka waa fursad aad u wanaagsan in aad heshiis la suubiso isbitaalada ku yaalo muqdisho si eey lacag dhimis kuugu suubiyaan oo aad adigan u keento dad aad u badan oo u baahan isbitaaladaas. Isla markaasna adiga waxaad nambarada ugu goyn kartaa bulshada si raqiis ah maxaa yeelay isbitaalada ayaa qiimo dhimis kuu suubiyay.

Hadii aad u baahan tahay warbixin dheeri ah oo ku saabsan fikradaan ganacsi waxaad nagu soo booqan kartaa xaruunteena oo ku taala dhanka midig ee masjidka xareed ama waxaa naga soo wici kartaa teleefankeena oo ku qoran bage-ka hore ee buugaan.

# Fikradaha kale (Others)

qeebtaan waxaa idinkugu soo gudbineenaaa fursado badan oo aan ku saabsaneen qeeybaha aan kor kusoo sheegnay.

Fikradahaas waxaa kamid ah

1. Franchise restaurants sida McDonald's, KFC, Johnny Rockets, Burger King, Subway and Domino's.
2. Toys company
3. Tool and equipment rentals
4. Shirkad diiwaan galisa Sabarloogooyinka dhulka
5. Shirkad isku xirta mobile money iyo internetka

## 96.Franchise restaurants sida McDonald's, KFC, Johnny Rockets, Burger King, Subway and Domino's

Wadanka waxaa hada ka shaqeeyo maqaayada cunto wanaagsan iibiya sida zeeytuuna restaurant lknse majiraan maqaayada caan ah oo ka furan wadanka.

Waxaad heshiisyo la suubin kartaa maqaayado badan oo caan ah sida Mcdonald restaurant iyo kfc restaurant.

Bulshada soomaliyeed aad iyo aad ayee u jecel yihiin in eey cunto ka cunaan maqaayad caan ah lknse in aad heshiis lagasho maqaayad caanah oo dunida oo dhan laga yaqaano ma ahan hool fudud lknse fursadaan waxaa ka faaideesan karo qofkii lacag heesta.

Hadii aad u baahan tahay warbixin dheeri ah oo ku saabsan fikradaan ganacsi waxaad nagu soo booqan kartaa xaruunteena oo ku taala dhanka midig ee masjidka xareed ama waxaa naga soo wici kartaa teleefankeena oo ku qoran bage-ka hore ee buugaan.

## 97.Toys company

Hada caruurta waxee  iib sadaan bistoolado iyo baaruud xiliyada iidaha inkastoo waayihii danbe aad u yaraadeen iibsashada iyo isticmaalka baaruuda, Taas badalkeeda caruurta waxee u baahan yihiin boombolooyin iyo qalabya kale oo eey ku cayaaraan iyo in eey qalabkaas wax ku bartaan.

Run ahaantii waa fursad aad u wanaagsan in aad wadanka usoo dhoofiso qalabyo eey ilmaha ku cayaaraan iyo kuwa eey wax ku bartaan.

Hadii aad u baahan tahay warbixin dheeri ah oo ku saabsan fikradaan ganacsi waxaad nagu soo booqan kartaa xaruunteena oo ku taala dhanka midig ee masjidka xareed ama waxaa naga soo wici kartaa teleefankeena oo ku qoran bage-ka hore ee buugaan.

## 98.Tool and equipment rentals

Wadanka wuxuu u baahan yahay shirkad qalabyada ka ijaarta ganacsatada wadanka. Qalabyadaas aad ijaari kartid waxaa kamid ah qalabka dhismaha guryaha matoorada iyo dhamaan mashiinada.

Xiligaan hadii eey shirkad u baahato qalab waa in eey soo iibsataa qalabkaas lknse hadii eey heli lahaayeen meel eey qalabkaas kasoo ijaartaan oo markeey dantooda ka dhameestaan u celiyaan aad ayee ugu wanaagsanaan laheed.

In aad bilaawdo shirkad ka ijaarta dadka qalabyada waa fursad wanaagsan lknse waa fursad eey aad u adagtahay in labilaabo waayo waxee u baahan tahay qarash aad ubadan in la bilaabo.

Hadii aad u baahan tahay warbixin dheeri ah oo ku saabsan fikradaan ganacsi waxaad nagu soo booqan kartaa xaruunteena oo ku taala dhanka midig ee masjidka xareed ama waxaa naga soo wici kartaa teleefankeena oo ku qoran bage-ka hore ee buugaan.

### 99.Shirkad diiwaan galisa Sabarloogooyinka dhulka

Fikradda ah diiwaan galinta iyo dokumendiyada waa mid aysan ka jirin qeybo ka mid ah Afrika, taas waxa ay horseedaa murano la xiriira dhulalka, sababtuna tahay in aysan kala caddeyn cidda leh dhulka. Xitaa meelaha ay ka jiraan diiwaanada , waxaa dhacda in la been abuuro dokumendiyada dhulalka ama sabarloogooyinka. Balse waxaa lasoo kordhiyay hab cusub oo lagu magacaabo Blockchain oo aanan la tirtiri karin diiwaanka iyo xogta meesha lagu kaydiyo. Waxa lagu keydiyaa heshiisyada, kuntaraadaha iyo waxyaabaha kale ee ay dadka isku afgartaan, ama kala saxiixdaan, taas oo hadhoow si madax banaan loo hubin karo qofkii u baahan.

Waxyaabaha cajiibka ka dhigaya habkan ayaa ah in uusan hal meel ku kaydsanayn, balse uu ku kaydsanyahay kumbuy-uutaro kala duwan oo kumanaan gaaraya, taas oo keenaysa in haddii mid laga tiro, kuwa kale uu ku harayo kaydka. Qof kasta oo ciwaan ku leh habkan ayaa eegi kara, islamarkaasna arki kara waxa meesha ku kaydsan.

## 100. Shirkad isku xirta mobile money iyo internetka

Dad badan oo soomaaliya ku sugan ma lahan akoono bangi, iyada oo barnaamijka taleefoonada lacagta laga dirsado ay noqdeen kuwa aad u guuleystay. Soomaaliya waxa ay kamid tahy hormuudka adduunka ee lacagaha la'isugu diro taleefoonada, sanadkii 2016-ka waxaa habkan isticmaalay wax ka badan 2 milyan oo qof. Balse dhibka jira ayaa ah in adeegyada la isticmaalo ay aad u badan yihiin, kuwaas oo adkaynaya in dad badan ay badeecoyin ka iibsadaan qadka internetka.

Waxaa soo alifay barnaamij lagu magacaabo Dirso oo bangiyada adduunka u sahlaya in ay aqbalaan lacagaha lagu diro taleefoonada in dadka isticmaala ay wax ka iibsan karaan qadka Internetka, gaar ahaan EVC plus iyo E-Dahab.

Hadii aad u baahan tahay warbixin dheeri ah oo ku saabsan fikradaan ganacsi waxaad nagu soo booqan kartaa xaruunteena oo ku taala dhanka midig ee masjidka xareed.

# Ganacsiyada Yaryar

Ganacsiga yar-yar ama heerka hoose waxa uu muhiim u yahay kobaca guud ee dhaqaalaha, sababtoo ah wuxuu isku xiraa alaabta ama adeega lasoo saaray iyo dadkii loo soo saaray ee u baahnaa isticmaalka badeecada ama adeega. Tusaale ahaan dukaanka xaafada ku yaalla wuxuu isku xiraa warshada baastada ee ku taalla Talyaaniga iyo reerka deriska la ah dukaanka.

Ganacsiga yar-yar noocyadiisa kala duwan waxaa ka mid ah:

- ✓ Dukaanlaha
- ✓ Tima jaraha
- ✓ Sariflaha
- ✓ Caseeyaha
- ✓ Foornada
- ✓ Gaari-gacanleyda
- ✓ Bajaajlaha
- ✓ Qudaareyda
- ✓ Cillaan Saarka
- ✓ Caasilayda

- ✓ Farmashiilaha
- ✓ Umulisada
- ✓ Caanolayda
- ✓ Footo-Koobiga
- ✓ Ceelka biyaha
- ✓ Iyo kuwa kaloo badan

# 10 qaab oo aad ku heli karto fikrad maalgalin

Waxaa jiro farsamooyin badan oo aad wax uga badali karto badeeco ama adeeg suuqa laga helo farsamooyinkaas waxaa kamid ah.

## 1) Upgrade

Waa farsamo cusub oo soomaaliya ka socoto farsamadaas oo ah in ganacsiyadii horey u jiray la hormariyo oo si ka wanaagsan sidii hore loo suubiyo.

**Tusaale ahaan**

Iibinta shaaha, cuntada, dharka iyo wixii lamid ah dhamaan badeecooyinkaas waa lo hormariyay oo tayada iyo adeega ayaa sare loo qaaday qiima kaa qaalisan kii horena waa lagu iibiyaa.

Halka cilad oo jirta waxeey tahay soomalideena aqoon dheeri ah uma lihin hormarinta bedeecooyinka qaar sida electronicska iyo wixii lamid ah lknse badeeco walbo oo aan awood u laheen in aan hormarino waxaan suubin karnaa in

aan soo dagsano (import) badeeco ka hormarsan mida suuqa taala. Sidoo kale Badeecooyinka aan hormarinay ama aan wax ka badalnay waxaa ka mid ah Furniture ( alaabta guryaha) iyo Gaaska cunta karinta

Laba nuuc ayaa farsamadaan (Upgrading) u suubin karnaa

1) In alaabta wax laga badalo tayadeeda astaamaha lagu yaqaano ama wax cusub kusoo kordhino, Nuucaan waxee ubaahantahay in aad uleedahay badeecada aad hormarin rabto aqoon gaar ah (technical skills)

2) In aan soo dagsano (import) alaab ka hormarsan mida suuqa taala. Nuucaan labaad wee fududahay waayo alaabta aad rabto in aad soo dagsato mid ka hormarsan waxaa ka raadin kartaa warbixinteeda internetka sida alibaba.com amazon.com ali express labadaas website waxaa laga heli karaa beadeeco kasta oo aduunka taalo **Fiiro gaar ah** markaan ku dhahay gal websiteka alibaba.com ama amazon.com ulama jeedo alaabta kasoo iibso ee waxaan kawadaa ka fiiri warbixinta badeecada aad rabi tusaale ahaan hadaa rabtib in aad

lasoo dagto mobile nuuc cusub ah waxaad geli kartaa labadaas website oo ka fiirin kartaa nuuc walbo oo mobil ah oo dunida yaalo.

Waxyaabaha keenay in badeecooyinka iyo adeegyada la sii hormariyo waxaa kamid

1. Dhaqaalaha dalka oo xoogaa sare u kacay sanadihii lasoo dhaafay. taas oo keentay in qeeba badan oo kamid ah bulshada ee kusoo biiraan dabaqada dhexe (middle income) bulshadaas oo dalbaneesa in wax laga badalo adeegyada iyo badeecadaha eey horey u isticmaali jireen

2. Dad badan oo qurbo jog ah oo kusoo laabtay wadanka dadkaas waxeey hore usoo isticmaali jireen badeecooyin iyo adeegyo heerkooda sareeya hadana waxeey rajeenayaaan badeecooyin iyo adeegyo lamid ah kuwii eey hore u isticmaali jireen.

3. Dhalinyaro badan oo wax bartay kana mid ah bulshada dhalinyaradaas oo ayagana rajeenaya in

wax laga badalo heerka tayo ee adeegyada loo fidiyo.

4. Isticmaalka internetka iyo social media oo keenay in dad badan eey arkaan badeecooyin iyo adeegyo oo eeysan hore u arkin.

Waa fursad ganacsi in aad hormariso badeecooyinka ama adeegyada lknse badeeco kasta hormarin laguma suubin karo maxaa yeelay waxaa laga yaabaa in macaamiisha ku qanacsanyihiin heerkeeda tayo ee hada ama eey qaali noqoto in tayada wax laga badalo islamarkaasna macaamiisha awood u yeelan waayaan qiimaha lagu soo kordhiyay.

## 2. Downgrade

Waa farsamo cusub oo soomaaliya ka socoto farsamadaas oo ah in badeecada ama adeega tayadeeda hoos loo dhigo si qiimaha lagu iibinanayo hoos loogu dhigo.

Tusaale ahaan badeecooyinka ama adeegyada downgrading lagu suubiyay waxaa kamid ah

- ✓ In gaadiidka dadka raacaan ee taxiyada lagu badalay bajaaj

Dadka markii hore waxee raaci jireen taxiyo qaali ahaa lknse hada waxaa loo keenay bajaaj ka raqiisan taxiyada.

- ✓ Cabitaanada caafi oo morkii hore u xir xirnaan jiray 500 litre ayaa hada waxaa laga dhigay 250 litre.
- ✓ Marka in alaab qaali aheed aad wax ka badasho oo tayadeeda hoos u dhigto isla markaasna raqiis ka dhigto waa farsamo muhiim ah oo aad ku heli karto fursad ganacsi oo aad maalgashato.

### 3. Bundle

Waa farsamo lagu helo fikrad ganacsi farsamadaas oo ah in la isku daro badeecooyinka ama adeegyada is leh.tusaale ahaan in la isku daro buugaag iyo qalimaan isla markaasna la isku iibiyo.

Waxyaabaha la isku dari karo waxaa kamid ah joodari iyo barkin sidoo kale waxaa la isku dari karaa kuliyadaha waxbarashada sida  business adminstration iyo information technology iyo wixii lamid ah.

Badanaa waxaa la isku daraa alaabta macaamiisha isku mar iibsadaan oo eey isku mar isticmaalaan

### 4. Unbundle

Waa farsamo lagu helo fikrad ganacsi farsamadaas oo ah in lakala furo badeeco ama adeeg isku xirnaa tusaale ahaan in la iibiyo hal kab oo kaliya isla markaasna laga iibiyo dadka naafada ah.

Waxaa jira badeecooyin badan oo la isku iibiyo suuqa marka waa fursad banaan in aad kala furto badeecooyinkaas.

## 5. Transport

U dhoofi ama udir badeecada ama adeegaas

- ✓ Meel aanan laga heleeyn alaabtaas ama adeegaas
  Tusaale ahaan in aad u dirto gobolada aanan laga heleeynin badeecadaas.

- ✓ Meel eey ku yartahay alaabtaas
  Waxaa jiro meelaha qaar eey ku yartahay badeecooyinka qaar marka waa fursad in aad alaabtaas u dirto meel eey ku yartahay

- ✓ Meel laga helaayo badeecadaas lknse eey qaali ka tahay ama eey tayadeeda ku yartahay.
  Waxaa jiro meelo qaar oo badeecooyinka qaar eey qaali ka tahay marka waa fursad in aad badeecadaas u dirto meel eey qaali ka tahay adiga oo lacag ka raqiisan mida suuqa gadaayo.

### 6. Mass market

Mass market waxaa layiraahdaa in aad badeecado u suuqgeeyso dhamaan macaamiisha tusaale ahaan waxaa jira badeecooyin badan oo laga helo kaliya meelo gaar ah marka waa fursad ganacsi in aad badeecooyinkaas u iibgeeyso dhamaan macaamiisha meel walba oo eey joogaan.

### 7. Narrowcast

Narrowcast waxaa la yiraahdaa In aad isku soo koobto kaliya meelo gooni ah tusaale ahaan waxaa jira idaacado kaliya tabiya wararka ciyaaraha sidoo kale waxaa jira kuwa tabiya kaliya wararka ganacsiga.

Hadii uu suuqa balaaran yahay oo eey macaamiisha badantahay waxaa wanaagsan kaliya in aad u adeegto macaamiil gooni ah oo baahi gooni ah u baahan.

### 8. Think big

Qaabkaan waa qaab aad ku iibineesid waxwalba shiikul kuli oo waxaad macaamiisha ka iibineesa waxwalbo oo macaamiisha u baahdo.

## 9. Think small

Isku day in aad iibiso hal badeeco iyo dhamaan wixii la xariira badeecooyinkaas. Markaas waxaa kuu suurtagali doono in aad macaamiisha ka iibisid dhowr nuuc oo eey badeecadaas ukala baxdo.

## 10 Price

Qiinaha waa waxyaabaha ugu wanaagsan ee lagu tartamo wadankeena. Hadii aad keentid badeeco raqiis ah waxee u badan tahay in badeecadaas lagaa iibsado dadka soomaaliyeed waxee jecel yihiin in eey si raqiis ah alaab ku gataan

**Sidoo kale qaabab kaana waa lagu heli karaa fikrad ganacsi**

- In badeeco horey u jirtay lagu suuqgeeyo si raqiis ah. Waxaa jira dad badan oo suuqa bakaaraha ka shaqeesto kuwaas oo alaabta kusoo iibsada si xaraash ah isla markaasna kusii iibiya si raqiis ah.

- In adeeg horey u jiray la hormariyo oo macaamiisha loo fududeeyo in si dhaqsa ah adeegaas ku helaan.

- In badeecada ama adeega tiradeeda ama tayadeeda la yareeyo isla markaasna la suuqgeeyo

- In wax yaabo aad jeceshahay oo aad xirfad gooni ah u leedahay ka ganacsato isla markaasna suuqgeeyso.

- In waxyaabo aad qibrad shaqo uleedahay aad ka ganacsato oo aad suuq geeyso.

- Isbadalada suuqa ku yimaado ka faaideesato oo aad ka ganacsato

- In aad badasho badeecada culeeskeeda oo aad ka dhigto wax la qaadi karo.

- In badeecada midab keeda ama muuqaal keeda wax ka badasho

- Cilmi baaris lagu suubiyay dadka ku guuleesta ganacsiga ayaa waxaa lagu soo ogaaday in ganacsiyada guuleestay eey u badanyihiin ganacsiyo qofki maalgashaday uu ahaa qof xirfad u leh ganacsigaas islamarkaasna aad u daneeynayay ganacsigaas.

# Gunaanad

Waxaan qoraalkeyga kusoo koobayaa ganacsatada waxey sharaf weyn ku leeyihiin bulshada, waa haddii ay yihiin kuwa daryeello diintooda, dalkooda iyo dadkooda. Qofka ganacsadaha ah waxaa loogu baahan yahay inuu noqdo shaqsi aad u qadariga naftiisa iskuna kalsoon in uu qaban karo hiigsiga ganacsigiisa. Ganacsiga wuxuu kobciyaa dhaqaalaha dalka. Haddii la helo ganacsato badan oo ku nool dalka gudigiisa waxaa kobci karo dhaqaalaha bulshada iyo guud ahaan dhaqaalaha dalka.

Ganacsiga marwalbo wuxuu kaaga baahan yahay oo kali waa inaad la timaado aragti cusub iyo qaab wanaagsan oo aad wax u wadi karto waliba adigoo fiirinaayo waxyaabaha aad kaga duwanaani karto shirkadaha kale afka ingariiska waxaa loo yaqanaa "business model". Markale dib u fiiri qaabka aad adiga u ganacsato, maxayse kaaga duwanyihiin ganacsatada kale.

Ugu danbeeyn waxaa kugula talinayaa in aad meel ku qorato fikrad walba oo kuugu soo dhacdo sidoo kalena waa in aad baaritaanku suubiso fikrad walba oo kuugu soo dhacdo